JAMHURIYADDA DIMOQARADIGA SOMALIYA

WASARADDA

WAXBARASHADA IYO BARBAARINTA

PJ
2534
.H2
A36
1972
v.3

# BUUGGA SADDEXAAD
# AFKA
# DUGSIYADA HOOSE

INDIANA UNIVERSITY
LIBRARIES
BLOOMINGTON

GUDDIGA AF SOMALIGA

— MUQDISHO 1972 —

4/30/82

## DIGNIINTA MACALLINKA

Buuggani waa kii säddexäad ee afka, loogun[a] talo galay Dugsiga Hoose ee carruurta somaliyeed, wuxuuna ka kooban yahay 72 cashar oo kala jaad ah.

Inkastoo buuggani ku qoran yahay afkii hooyo, haddana waxaa macallinka laga codsanayaa inuu fiiro gaar ah u yeesho siduu ugu fududeyn lahaa erayada ardayga u cusub ee ku jira casharrada buuggan ku qoran.

Waxaa kaloo aad buuggan ka heleysaa 23 masawir ee mid waliba ku saabsan yahay wax micne ama qiimo gaar ah leh.

Waxaan ku kalsoon nahay in buuggani waxtar weyn u yeelan doono ardada Dugsiga Hoose ee sannadka saddexaad.

**Guddiga af Somaliga**

## TUSMADA BUUGGA


| | | |
|---|---|---|
| Edebta hadalka | Baalka | 9 |
| Afka hooyo | » | 10 |
| Waqtiga falka | » | 12 |
| Dekadda | » | 13 |
| Islaamku waa ismaqal | » | 13 |
| Warshadda kalluunka | » | 16 |
| Sheekadii Nebi Muxamad | » | 17 |
| Muqdisho | » | 19 |
| Habeenka iyo maalinta | » | 21 |
| Kol haddaan hantiyey | » | 22 |
| Asturaadda jirka waqtiga salaadda | » | 24 |
| Diiq iyo Dawaco | » | 25 |
| Jamaca magacyada dheddig | » | 27 |
| Dhagaxtur | » | 28 |
| Ka fogow khayaanada | » | 31 |
| Waa waxa dhulkeenna u gaar ahoo (hees waddani ah) | » | 32 |
| Mukulaashi Xalimo | » | 33 |
| Qaangaarka | » | 34 |
| Raadiyaha | » | 35 |
| Dukaankii Liban | » | 37 |
| Warshadda hilibka | » | 38 |
| Hanaddadiyow horuu wada (hees waddani ah) | » | 40 |
| Ma is raaci karaan (geeraar) | » | 40 |
| Fal amarka | » | 41 |
| Beerta ubaxa iyo midda xoolaha | » | 42 |
| Fasalka dugsiyada | » | 43 |
| Jeerta | » | 44 |

Cumar bin-khaddaab . . . . . . . . . . . . . » 46
Ballanka . . . . . . . . . . . . . . . » 47
Maahmaahyo . . . . . . . . . . . . . . » 47
Beeraley . . . . . . . . . . . . . . . » 48
Wilwal . . . . . . . . . . . . . . . » 49
Faal . . . . . . . . . . . . . . . . » 50
Libaaxa . . . . . . . . . . . . . . . » 52
Galley . . . . . . . . . . . . . . . » 53
Dharka . . . . . . . . . . . . . . . » 54
Mowliid . . . . . . . . . . . . . . . » 55
Boolisku waa saaxiibka dadka . . . . . . . . » 57
Maroodiga . . . . . . . . . . . . . . . » 58
Sanan (biti daran) . . . . . . . . . . . . » 59
Xeer jebin . . . . . . . . . . . . . . . » 60
Geedaqoraha . . . . . . . . . . . . . . . » 62
Mingis iyo wadaaddo . . . . . . . . . . . » 64
Fal ma ebyane . . . . . . . . . . . . . . » 65
Reer miyiga . . . . . . . . . . . . . . . » 66
Geesinnimo . . . . . . . . . . . . . . . » 68
Dharbaaxadii dhurwaaga ku dhacday . . . . . . » 69
Ayaxa . . . . . . . . . . . . . . . . » 72
Birtumaha . . . . . . . . . . . . . . . » 73
Maxaa dunida is wada daba dhigay . . . . . . » 75
Koolkoolis carruureed . . . . . . . . . . . » 75
Iidaha . . . . . . . . . . . . . . . . » 76
Miraha . . . . . . . . . . . . . . . . » 77
Macallinka . . . . . . . . . . . . . . . » 79
Qodobbada . . . . . . . . . . . . . . . » 80
Xoolaha . . . . . . . . . . . . . . . . » 81

Gacanta Maroodiga . . . . . . . . . . . . » 83

Awrka . . . . . . . . . . . . . . » 84

Somaliya weeye waddankeennu (hees waddani ah) . » 85

Isrogrogga codalka, Xiriiriye . . . . . . . . » 86

Edebta jidka loo maro . . . . . . . . . . » 87

Qoraha . . . . . . . . . . . . . . . » 88

Libaax iyo jiir (doolli) . . . . . . . . . . » 90

Geedaha timirta . . . . . . . . . . . . . » 91

Hantiwadaagga cilmiga lagu habeeyey
(hees waddani ah) . . . . . . . . . . . . » 93

Tilmaame iyo magacuyaal su'aaleed
(kee?, Tee?, kuwee?) . . . . . . . . . . . » 94

Baranbaro . . . . . . . . . . . . . . » 95

Guurka . . . . . . . . . . . . . . . » 97

Tiro magac . . . . . . . . . . . . . . » 99

Fiidmeerta (kabelli) . . . . . . . . . . . » 100

Maxaad jeclaan lahayd inaad noqotid markaad
weynaatid . . . . . . . . . . . . . . . » 101

Fal ahaansho iyo fal lahaansho . . . . . . . . » 103

Beeraha . . . . . . . . . . . . . . . » 104

Iidda 21 Oktobar . . . . . . . . . . . . » 105

Afro-Asiya (hees waddani ah) . . . . . . . . » 107

Casharka 1

## EDEBTA HADALKA

Nicmada Ilaahay dadkiisa siiyey way badan tahay. Waxaa ka mid ah roobka, xoolaha, iyo caafimaadka. Waxaa kaloo ka mid ah carrabka lagu hadlo. Markii qofku hadlayo, waxaa fiican inuu hadalkiisa edeb u yeelo. Sida hadalka edeb loogu yeelaana way badan tahay.

Qofku markuu hadlayo, waa inuusan cod dheer ku hadlin, illeen qof kasta dhegallaawe ma ahee. Dheguhu way neceb yihiin hadalka dhaadheer ama buuqa.

Mid kale, edebta hadalka waxaa ka mid ah, qofka kaa weyn waa inaadan cod dheer kula hadlin. Dadka waaweyni maamuus bay dadka yaryar ku leeyihiin. Tan saddexaad, haddaad qof u yeereyso, wanaaggu wuxuu yahay inaad magaciisa ugu yeerto. Waxaa lagaaga digayaa inaadan dadka ugu yeerin naynaas ceeb leh, ama dheeldheel ku jiro. Edebta ku saabsan wadahadalka waxaa kaloo ka mid ah, kolkuu qofku sheekeynayo waa inaadan hadalka kolba ka dhex gelin ama ka joojiin. Waa inaad hadalka ka sugtaa oo u fiirsataa oo haddaad damacdo aad si qabow oo miyir leh wax u weydiisaa.

Macallinku markuu casharka marinayo waa inaad sugtaa oo dhegeysataa intuu hadalkiisa dhamaynayo, haddii wax kugu adkaadaan oo aad kasi weydo, marka dambe waa inaad gacanta taagtaa oo aad warsataa.

Sidaas oo kale, ayaa wanaaggu yahay inaad dadka kalena kula socoto. Edebta iyo xishoodka diinteenna ayaa na fartay. **Edebtu hadalka waa qurxisaa sida dharku dadka u qurxiyo.**

**Layli:**

**Erayadan kuwa la mid ah sheeg.**

1. Edeb, dhaadheer, qofka, nicmada.

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Wax ka sheeg nicmada Eebbe na siiyey.
2. Wax ka qor edebta hadalka.
3. Wiilka ama gabadha edebta leh maxaa lagu gartaa?

## Casharka 2

## AFKA HOOYO

Tawraddeennan hagaagsan,
Waddankanuu halgamaya,
Dawladihii ka horreyey,
iyagaa na hor joogey,
Isticmaar la heshiiyey,
Hog madow nagu tuuray,
Harraad baanu qabnaaye,
Farta hooyiyo aabbe
Hore noogu dhigaay!
Halyaygeenna Siyad,

Waddankeenna hoggaansha,
Khayrka noo hor kacaaya,
Isba diid hurdo dheere,
Waa kan haysta badiilka,
Harraad baanu qabnaaye
Farta hooyiyo aabbe
Hore noogu dhigaay.

Axmed Cabdullaahi Qaalib.

«...Waxbarashadu macno yeelanmayso, haddii ayan niyad waddani ah ku dhisnayn.»
Jaalle Maxamad Siyad Barre, Madaxweynaha Jamhuriyadda Dimoqaradiga Somaliya «26 Juun 1970kii».

## Casharka 3

## WAQTIGA FALKA

| KELI | JAMAC |
|---|---|
| Anigu waan Cunay | Annagu wan Cunnay |
| Adigu waad Cuntay | Adinku waad Cunteen |
| Asagu wuu Cunay | Ayagu way Cuneen |
| Ayadu way Cuntay | |

Waan Cuni lahaa
Waan Cuni karaa

Waan Cuni jirey
Waan Cuni doonaa

**Layli:**

**Sheeg falalkan waqtigooda**

1. Cun, gub, dil, raac, lul, gaar, reeb, akhri, saar.

**Weerahan Murtida leh baro**

1. Dhurwaaga «yur» dheh.
2. Fadumo «Dharka dhaq» dheh.
3. «War hayaaydiisa» baan maqlay dheh.
4. Bal ninka «Immisaad geeli siisatay» ku dheh.
5. «Qac» baan maqlay dheh.
6. «Somali waa lagu yaqaan» dheh.
7. «Dadku waa hantiwadaag» ku dheh.

## Casharka 4



DEKADDA

Adduunyada oo dhan waa bad iyo birri.

Meesha labadoodu ay isugu yimaadaan waxaa la yiraahdaa xeeb. Somaliya waxay ka mid tahay dalalka xeebaha dhaadheer leh. Waxaase jira dalal badan oo aan xeebo lahayn.

Dal walba horumarkiisa waxaa lagu ogaada hadba sida uu u samaysto dekadihiisa iyo furdooyinkiisa. Dekadi maxay tahay? Dekaddu waa meesha maraakiibta iyo doonyuhu ay fariistaan amaba ay ku xirtaan.

Dalkeennu dekado badan buu leeyahay, waxaana ka mid ah: dekadda Xamar, Kismaanyo, Berbera, Marka, Barawe, Bosaso, Lasqoray iyo Saylac.

Dekaduhu waa meelaha dhaqaalaha u keena waddanka. Ayaan walba waxaad arki kartaa maraakiib badan oo ku xiran dekadda Kismaanyo, waxayna nooga yimaadaan dalal aad u fog. Maraakiibtaasi waxay ka qaataan dakadahaas kumayaal cuddadood oo badeeco ah iskuguna jira: moos, harag, khudrad iyo xoolo nool intaba. Waxaa kaloo ay ka qaataan hilbo daasado lagu alxamey, lafo, geeso iyo foolmaroodi (faano ama ilko).

Dekadda Berbera waxaa laga saaraa xoolaha nool arì, lò iyo geel, hargahana waa laga dhoofiyaa. Haddaad aragtid dekadahaas oo kumanyaal gof ay ka shaqeynayaan, maraakiibtuna ay is weydaaranayaan, waxaad garan kartaa in dakaduhu dhaqaalo badan waddanka u leeyihiin.

## Casharka 5

## ISLAAMKU WAA IS MAQAL

Wiil Axmad la yiraahdo ayaa aabbihiis u raacay masaajidka inay ku soo tukadaan saladda maqrib. Irridda masaajidka markay yimaadeen bay kabihii iska bixiyeen oo masaajidka galeen. Xoogaa yar dabadeed ayaa salaaddii loo kacay Inmaamkiina dadka hortiisa buu istaagay. Axmad wuxuu isla taagey carruurtii kale oo safka dambe taagnayd. Dabadeed salaaddii ayaa la tukaday. Kolkii salaaddii laga soo jeestey ayaa Axmad iyo aabbihiis is raaceen. Axmad wax buu soo arkay, intuu aabbihis la so-

cday. Waxyaalo badan oo salaadda ku saabsan buu aabbihiis weydiiyey:

Wiilkii:

Aabbe carruurtu maxay safka dambe isu taageen?

Aabbihiis:

«Sidaas weeye nadaamka salaadda wadajirka loo tukadaa.»

Wiilkii:

Muxuu yiri Imaamkii intaan salaadda la xiran?

Aabbihiis:

Wuxuu yiri, «Safafka toosiya, maxaa yeelay, Ilaahay ma eego safka qalloocan».

Wiilkii:

«Oo safka toosani muxuu taraa?»

Aabbihii:

«Waxaa la doonayaa in dadku ay ka bartaan siday noloshooda u toosin lahayeen».

Wixii toosani ka wanaagsan wixii qalloocan.

Waxaana la doonayaa oo kale in dadku ismaqlaa oo wixii lays faro la yeelaa, sidaasaa imaamka salaaddu dadka faray, islaamkuna markaad u fiirsato waa is farid iyo ismaqal.

**Layli:**

1. **Erayadan weero ku dar.**

   Raac, imow, loo kac, wadajir, ismaqal.

2. **Erayadan meelaha ka bannaan buuxi.**

   Salaad————loo tukadaa ———— dadku wuxuu inay———— oo si toosan u———— maxaa yeelay Islaamku waa ismaqal.

## Casharka 6

## WARSHADDA KALLUUNKA

Inkastoo dalkeenna dhammaantiis ay ku wareegsan tahay badi, waxaa la ogaaday inaan intiisa badani shaqada badda ayan jeclayn. Sidaas daraddeed kuma badna dalka warshadaha kalluunku. Laba warshadood oo kalluunka lagu farsameeyo ayaanu leennahay. Mid waxay ku taal degmada Lasqoray, midda kalena waxay ku taal degmada Qandala. Warshadahaasi waxay ka kaluumaystaan gacanka Cadmeed iyo Badweynta Hindiya. Warshadahaasi waxay ku yaalliin Koofurta gacanka Cadmeed.

Biyaha Badweynta Hindiya way deggan yihiin, kalluunkuna aad buu ugu badan yahay. Warshadahaasi suuq fiican bay ku leeyihiin dalalka shisheeyaha ee aan heshiiska kala leennahay xagga beecmushtarka. Boqollaal Somali ah baa ku nool oo ka shaqaysata. Warshaduhu waxay sameeyaan dhawr jaad oo kalluun ah, oo daasado ku guraan. Daasadahaas waxaa ku qoran magaca warshadda iyo kan Somalida. Mar keliya haddaad dhadhamin lahayd kalluunka dalkeenna, waxaad ogaan lahayd waxtarkiisa iyo w a n a a g g i i s a. Waxaa taas u dheer kalluunku inuu nuxur u leeyahay dadka, maskaxdana u fiican yahay. Jaadadka kalluunka waxaa ka mid ah: tebediin, tarraaqad iyo qardabo.

**Layli:**

1. Immisa warshadood oo kalluumaysato ah baa ku yaal dalkeenna? Degmooyinkee bayna ka dhisan yihiin?
2. Kalluunku muxuu jirka taraa?
3. Somalidu maxay u cuni weydey kalluunka?

## Casharka 7

# SHEEKADII NEBI MUXAMAD

Nebiga naxariisi korkiisa ha ahaatee, intaan «WAXYIGU» u soo degin, dadka kale tilmaamo badan buu ka lahaa. Waxaana ka mid ahaa runta, ammaanada, edebta iyo himmad weynaanta. Sidaas daraaddeed, ayuu ku helay haweeney uu guursado tii ugu horreysey oo la oran jirey Khadijo.

Nebigu kolkiisa horeba, sannad kasta bisha Ramadaan oo dhan gurigiisa dibedduu ka jiri jirey oo meel cidla ah buu ku cibaadeysan jirey. Maalin maalmaha ka mid ah, ayaa Nebiga waxaa u yimid Malag Jibril oo isla kolkiiba faray inuu «wax akhriyo». Nebigu wuxuu ugu jawaabey, wax ma akhriyo (*)».

Kolkastana sidaasuu yiraahdaa. Markii saddexaad buu Jibril ku yiri Nebigii waxaad akhrisaa **suuradda horraanteedu tahay «IQRA».**

Markiiba Nebigu suuraddaas horraanteedii buu akhriyey waxaana u meeriyey **Jibril.** Nebigu isagoo argagaxsan oo dhididsan buu gurigiisii degdeg u yimid. Wuxuu ku yiri abbaayo Khadijo «I deda I deda». Kolkuu Nebigu soo baraarugey ayuu u sheegay ooridiisii wuxuu arkay. Abbaayo Khadijo waxay ku tiri «Inshaa-Alla waxaad noqon doontaa Nebigii Ilaahay'u soo diray dadkeenna. «Sidaasaa wax Nebiga rumeeya ay ugu horreysey Abbaayo Khadijo, raggana waxaa ugu horreyey Sayiddunaa «Abubakar». Carruurtana waxaa ugu horreeyey

---

(*) Mucjisaadka Nebiga waxaa ka mid ahaa inuusan wax qori jirin waxna akhri jirin.

wax muslima «Cali Bin Abii Dhalib» oo ay Nebiga ilmo adeer ahaayeen.

Intaas wixii ka dambeeyey Nebigu diinta Islaamka wuxuu ku fidiyey dadkii, wuxuuna faray inay sanamada ka tagaan oo Ilaah keliya rumeeyaan oo caabbudaan.

Nebiga markii hore si xoog ah ayaa dadkii kufaarta ahaa isu hortaageen, dhibweyn ayayna u geysteen. Dadkii rumeeyey ee raacayna waa la lug jaray. Inkastoo muslimiinta markii hore si weyn loo dhibay oo loo cadaadiyey, haddana dadku rag iyo haween, yar iyo weynba, diinta Islaamka bay soo galeen.

Muslimiinta, si weyn baa Reer Maka waxyeello ugu geysteen, Nebiguna kama harin oo kama quusan inuu fidiyo oo faafiyo diintii Ilaahay faray.

Kolkuu Nebigii arkay in muslimiinta dhib weyni ku heysto Maka, ayuu markii dambe kula taliyey inay ka qaxaan oo u baxaan Madiina. Sidii bayna yeeleen. Waqtigaas ayaana taariikhda Islaamka ee HIJRADA loo yaqaan bilaabatay.


Markay muslimiintu soo gashay Madiina, ayaa dadkii degganaa si fiican u soo dhoweeyeen oo magaaladii u dejiyeen. Diinta Islaamkuna si gaar ah bay ugu faaftay gobolladii dhulkaas oo dhan.

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Sheeg tilmaanta Nebiga.
2. Meeshee buu Nebigu ku cibaadeysan jirey?
3. Waxaad qortaa intay maanta tahay taariikhda Islaamku.
4. Reer Madiina sidee bay muslimiintii u soo dhoweeyeen?

## Casharka 8



**MUQDISHO**

Somalidu magaalada Muqdisho hore waxay ku magacaabi jirtey Xamar. Xamar waa magaalada ugu weyn Somaliya, waana magaalamadaxdii dalka. Waa xaruntii Jamhuriyadda iyo fadhigii dawladda .Waa meesha laga maamulo dhaqaalaha: bangiyada, bostooyinka, furdooyinka, kuwaas oo ah noloshii dhaqdhaqaaqa dhaqaalaha waddanka. Waxay leedahay gagi dayuuradeed oo wanaagsan, dekad iyo furdo, goobaha kubbadaha cagta iyo tan dambiisha, daarta idaacadda, Jaamacad, taallooyin xasuus leh, masaajidyo, isbitaallo, dugsiyo waaweyn iyo warshado waxtar leh oo ay ka mid yihiin kuwa lagu farsameeyo. suufka, caanaha, saabuunta, hilibka, haragga iyo meesha lagu daabaco wargeysyada iyo tan korontada.

Meelaha waqtiga la isku dhaafiyo, waxaa ka mid ah: shineemooyinka iyo golaha maaweelada. Waa magaalo qurxoon, daaraheeduna si wanaagsan bay u dhisan yihiin, waxayna leedahay bad fiican oo dadku jecel yahay, kuna dabaashaa. Dadka Muqdisho deggan tiradiisu waxay ku dhowdahay laba boqol oo kun. Dad shisheeye ah ayaa magaalomadaxda Muqdisho dalxiisnimo u yimaada. Dadkaasi waxay daawadaan meelaha taariikhda leh oo ay ka mid yihiin. Qalcadii Burtuqiisku dhisay iyo masaajidyada Arbaca Rukun, Jaamacada, masaajidka Fakhruddiin iyo Daarta Xannaanada Dhaqanka iyo Hiddaha Somalida.

**Layli:**

1. Ka warran Muqdisho, maxay magaalooyinka dheer tahay?
2. Magac kale ma leedahay?
3. Dadka deggan Muqdisho tiradiisu waa immisaa?

## Casharka 9

## HABEENKA IYO MAALINTA

Habeenka iyo maalintu waa laba waqti oo aan laga maarmi karin. Dadka waxay la tahay in habeenka iyo maalintu, sidaas isaga socdaan. Laakin, waxaa jira waxyaalo waaweyn oo ay ina taraan. Waxaa ka mid ah: maalintii qorrax baa soo baxda, ileys iyo nolol bay adduunyada siisaa.

Dadku wax buu qabsadaa, xoolaha iyo shimbiruhu waa daaq tagaan, dugaagga iyo halaqu waa soofaan, dhulka iyo dhirtuna waa diirsadaan. Habeenkii nafleyda inteeda badan way seexataa, si ay uga nasato nooggii iyo dhibkii ay soo martay dharaartii.

Dayaxa iyo xiddiguhu waxay na siiyaan iftiin iyo daawasho yaab leh. Habeenka iyo maalinta isweydaarkooda waxaan ku garannaa bilaha, sanooyinka iyo xilliyada. Guga iyo deeyrta roob baa noo da'a, xagaaga iyo jiilaalkase dabaylo iyo kulayl baa nagu bata. Intaas aan soo sheegnay waxaan ku garannaa in awood tan dadka ka weyni jirto oo maamusha dunida, maxaa yeelay, waxaan naqaan dadka taagtiisa iyo tabartiisu intay gaari karaan. Jiridda habeenka iyo maalinta waxaa noogu caddaada in Ilaah jiro, oo awoodddaas isagu leeyahay, uuna uumay habeenka iyo maalinta. Innagu waa inaan aqoonsannaa oo ku mahadinnaa Eebbeha na siiyey iftiinka iyo kulaylka aan daraaddood ku helno dheefta iyo barwaaqada.

**Layli:**

1. Maalintu máxay tartaa?
2. Goormaan aragnaa dayaxa iyo xiddigaha?

## Casharka 10

## KOL HADDAAN HANTIYEY

Kol haddaan hantiyey
hawshii dalkee
nacab haysan jirey
aan horuu maroo
baryadoon ka haroo
hilinkeer maroo
oo horor dambiyo
halaq iyo abees
hoos ii dhigayn
hiil iyo haddaan
hoo leeyohoo
aanan hawlanayn;
kol haddaan hurdadii
aan ka toosayoo
oo aan wixii
horay layga dhacay
soo hooyiyey shalay
hiil iyo haddaan
hoo leeyohoo
aanan hawlanayn;
kol haddaan sharcigii
la hagoogi jirey
heeryada ka rogey
oo ay dadkii
ku hungoobi jirey

hal wada yihiin
hiil iyo haddaan
hoo leeyohoo
aanan hawlanayn.

**Layli:**

1. **Heestaan kor ka baro.**

«...Innagu waxaannu diiddan nahay in koox yari ay ku kor noolaato dadweynaha ama ay dhiigga ka nuugto shaqaalaha!»
Jaalle Maxamad Siyad Barre, Madaxweynaha Jamhuriyadda Dimoqaradiga Somaliya (26 Oktobar 1971).

## Casharka 11

## ASTURAADDA JIRKA WAQTIGA SALAADDA

Qof kasta dhar buu qaataa. Dharkaasuna waa kuwo gaagaaban ama dhaadheer. Muxuu dharku inoo taraa? Jirkuu asturaa oo qurxiyaa.

Kolkaad salaadda tukanaysid waxay diintu kuu sheegtay inaad dhar ku astura gashataa, haddii kale salaaddu waa kaa jabaysaa. Markaad tukanaysid waxaa lagu faray inaad jirkaaga inta xuddunta ku beegan ilaa jilibka hoostiisa aad qarisaa. Haweenkuse waa inay qariyaan jirka intiisa badan, waxaana la faray in ay banneeyaan wejiga, gacmaha iyo cagaha. Qof kasta markuu aadayo meel laga wacay ama meel kale oo daawasho ioo tegayo, dhar fiican ayuu ku baxaa. Lakin taas waxaa ka roon, marka qofku tukanayo inuu dharkiisa kan u nadiifsan qaato. Ma og tahay waqtigaas oo kale qofku inuu Ilaahay hor taagan yahay? Waxaa layna faray inaynu si xushmad leh salaadda u gudannaa, jirkeennana u asturnaa.

**Layli:**

**Erayadan ka dhig jamac.**

1. Salaad, waqti, gacan, weji, cag, nadiif, xushmad.

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Intee buu raggu jirka ka asturaa?
2. Intee bay haweenku jirka ka asturaan?
3. Maxay tartaa asturaadda oogadu waqtiga salaadda?



## DIIQ IYO DAWACO

Maalin baa diiq food dheer lihi ciddii lahayd ka yare durkay isagoo cunto daydayanaya. Meel leexsan ayuu kula kulmay dawaco dhusdhus leh. Kolkiiba geed agtiisa ahaa ayuu ku booday. Dawacadii oo geedkii hoos taagan ayaa diiqii la hadashay oo waxay tiri, «foodlow codkaaga wanaagsan xoogaa i maqashii, hana baqane soo deg aynu sheekaysannee.» Diiqii baa u jawaabay oo wuxuu

yiri, «Waxaad tahay dawaco xeelad badan, sidee kuu aaminaa»? Dawacadii baa u jawaabtay iyadoo qoslaysa, «Miyaadan ogeyn xeerka cusub oo libaaxu u sameeyey habar dugaag oo dhan? Xeerkaasu waa, inuu waraabuhu la socon karo wanka, oo mukulaashu la cayaarto jiirka, oo dawacadu raacdo oo la sheekeysato digagagga» Diiqii baa dabadeed ciyey Ku! Ku! Ku! Kuu! «Warkaasu waa mid fiican, ee waxaan ku leeyahay eydaas soo rooraysa ka hor tag oo la cayaar». Dawacadii baa dabadeed eeydii ka cabsatay. Markuu diiqii arkay dawacadii oo baqanaysa buu ku yiri «Ha baqan, xeerkaad sheegtay baa inoo yaale!». Dawacadii waxay ku jawaabtay intayan cararin «Waxaan ka baqayaa inayan eydaasu xeerka cusub weli maqal. «Halkii bey dawacadii ka carartay».

**Layli:**

**Erayadan magac raaci.**

1. ———weyn———cusub, ———dhusdhus leh.

**Ka jawaab su'aalahan**

1. Markuu diiqii arkay dawacadii, xaggee buu aaday?
2. Dawacadii maxay ku tiri diiqii kolkay sasabanaysey?
3. Sheekadaasu maxay ku tusaysaa?

Casharka 13

## JAMACA MAGACYADA DHEDDIG

Casharkan waxaa wax la idiinka sheegayaa magacyada dheddigi siday jamaca u qaataan.

Magacyada dheddig qaar «O» bay xagga dambe ka qaataan, si ay jamac u noqdaan. Kuwaas waxaa ka mid ah:


| | |
|---|---|
| Kab | Kabo |
| naag | naago |
| Gees | Geeso |
| Daar | Daaro |
| Ul | ulo |

Qaybta labaadna «Oyin» bay xagga dambe ka qaataan, waxaana ka mid ah:

| | |
|---|---|
| Dermo | Derm**ooyin** |
| Duddumo | Duddum**ooyin** |
| Hooyo | Hooyo**oyin** |
| Buulo | Buul**ooyin** |
| Heello | Heellooyin |
| Talo | Tal**ooyin** |
| Waddo | Wadd**ooyin** |
| Caado | Caad**ooyin** |

**Layli:**

Qor toban magac oo dheddig oo qaata «oyin» ama «O». Markii ay Jamac noqdaan.



## DHAGAXTUR

Waddan waliba wuxuu leeyahay taariikh u gaar ah. Waddankeennu wuxuu soo maray halgan badan oo gobannimaddoon ah. Mararka qaarkood waxaa laga sheekeeyaa geesiyaal wax weyn waddanka u galay, sida: Axmad Gurey, Sayid Maxamad, Shiikh Xasan Barsame, Wilwal iyo kuwo kale oo badan. Waxaa jira dagaalkii labaad ee dunida kaddib in dalkeenna ay ka abuurmeen ururro waddani ah oo doonayey gobannimo. Kuwaas waxaa ka mid ahaa: «Kulanka Dhallinyarada Somalida» oo Xamar laga aasaasay sannadkii 1943, bishi Mey. Uururkaas waxaa aasaasay 13 nin oo dhallinyaro ah, waxayna

u dejiyeen xeer aad u wanaagsan tilmaamayeyna: «Somalidu inay isku mid tahay oo ayan nin kore iyo nin hoose lahayn; qabiilnimo in la tiro iyo dawlad Somaliyeed oo loo siman yahay in la dhiso. Waddanka Somalida oo dhan markaas waxa u talin jirey Ingiriis.

Kulankaas dhallinyaradu wuxuu suubsaday cuntubyo dhallinyaro ah oo rag iyo haweenba leh, wuxuuna ku magacaabay «Horseed». Cuntubyadaasi waxay ku dhaaran jireen inay dalkooda xornimo gaarsiiyaan una dhintaan haddii loo baahdo. Gobalka koofureed oo Somalida waxaa ka dhacay dagaallo badan oo ay iskaga hor yimaadeen Somalida iyo gumeysatadu, laakin nasiib wanaag, libta dambe waxaa yeelan jirey Somalida. Dagaalladaas waxaa ka mid ahaa kii ka dhacay goobta loo yaqaan Dhagaxtur, taariikhdu markii ay ahayd 5tii Oktobar 1948. Goobtaas Ingiriiska iyo askartiisu waxay ku dagaallamayeen rasaas, Somaliduna waxay ku dagaallamaysey dhagaxyo, ulo iyo seefo. Meeshaas Somali badan baa ku dhimatay, inkasta oo ay u badnaayeen dhallinyaradii Horseedka. Dagaalkaas kaddib, Ingiriisku Somalida waa tix geliyey, wuxuuna doonay in xeer nabadeed la dhigto. Isaguna in uunan hor joogsan Ururka gobannimaddonka ah. Dadka Somaliyeed meel kastaba ha joogee,xusuus weyn buu u leeyahay dagaalkii Dhagaxtur. Somalidu waxay Gobannimadeeda qaadatay 1960kii. Laga soo billaabo waqtigaa ilaa bishii Oktobar 1969, waxaa dhisnaa dawlad somaliyeed oo madax ban-

naan. Dawladda isi xusuus bay u yeeshay goobtii Dhagaxtur. Dabadeedna 21 Oktobar 1969 markii dalka Tawraddu ka dhalatay, goobtii Dhagaxtur waxaa laga sameeyey taallo dheer oo marmar ah iyo beer weyn oo ubax badan. Haddaad Xamar timaadid waad arki kartaa taallada Dhagaxtur oo quruxda badan ee ku ag taal aqalka dadka.

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Magacaw ururkii waddaniga ahaa goorti la aasaasay. Intee nin baa aasaastay ururkaas? Xaggee baana lagu aasaasay?
2. Wax ka sheeg xeerkii uu samaystay ururkaasi.
3. Ma sheegi kartaa maalintii, bishii iyo sannadkii uu dhacay dagaalkii Dhagaxtur?
4. Dhiiggii ku daatay goobtii Dhagaxtur dadka Somaliyeed maxay ku gaareen?
5. Goobtii Dhagaxtur maxaa laga taagay Tawraddu markay ka dhalatay dulkeenna?

> «...Iskaashiga, wadajirka iyo xoogsigu waxaa weeye hubka inoo soo jiidaya ciribdambeed adag iyo horukac wacan!».
> Jaalle Maxamad Siyad Barre, Madaxweynaha Jamhuriyadda Dimoqaradiga Somaliya (27 Juun 1971, Burco).

## Casharka 15

## KA FOGOW KHAYAANADA

Qofka wanaagsan iyo qofka xun waxyaalo badan baa lagu kala gartaa. Waxyaalaha qofka xumaanta u keeni karaa way fara badan yihiin. Dadku ma jecla qofka ammaanada cuna ballankana ka baxa. Waxaa kale oo la neceb yahay xanta iyo beenta. Qofkii lagu bartaa waxyaalahaa aan soo sheegnay oo dhan dadku waa ka fogaadaa oo waa la iska ilaaliyaa. Qofka caynkaas ah siyaalaha looga aqoonsado dadka waxaa hore noo tusaaleeley Nebigeenna Muxamad, naxariis iyo nabadgelyo korkiisa Ilaahay ha yeelee, oo wuxuu yiri saddex calaamo ayaa lagu aqoonsadaa munaafaqa, kuwaasoo ah:

1. Haddii u ballan qaado wuu ka baxaa;
2. Haddii uu hadlo been buu sheegaa;
3. Haddii la aaminana khiyaano ayuu ku kacaa.

Waxaa kale oo Nebigeennu, naxariis iyo nabadgelyo korkiisa Ilaahay ha yeelee, daliil cad naga siiyey qofka aan la socon nolosha iyo xeerka ama is-afgaradka guud ee dadku ku sugan yahay, oo wuxuu yiri «wadajir baa laydin faray, maxaa yeelay waraabuhu wuxuu ariga ka cunaa rida gooni daaqa ah».

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**


1. Maxaa Nebegu ku tilmaamay munaafaqa?
2. Rida gaar daaqa ah maxay halis u tahay?

Casharka 16

## WAA WAXA DHULKEENNA U GAAR AHOO

Geed qodax leh iyo
godin iyo hangooi
waa waxa dhulkeenna
u gaar ahoo laynagu gartaa
maantay galladi noo soo gashee
gobonnimadayada guullow adkee
reer geeddiyiyo gabar tima tidcani
waa waxa dhulkeenna
u gaar ahoo laynagu gartaa
wiil geel jiroon
gaajadu karayn
waa waxa dhulkeenna
u gaar ahoo laynagu gartaa
ido gorod leh iyo dibi gees madow
waa waxa dhulkeenna
u gaar ahoo laynagu gartaa
awr gibil leh
iyo gaashaan xardhani
waa waxa dhulkeenna
u gaar ahoo laynagu gartaa
maantay galladi
noo soo gashee
gobannimadayada
guullow adkee

Cabdullahi Cabdi Shube



## MUKULAASHI XALIMO

Gabar la yiraahdo Xalimo ayaa waxay lahayd mukulaal. Waxayna Xalimo mukulaasheedii ula baxday «Shobto». Shobto waxay lahayd barabaro qurux badan.

Maalin dambe ayaa doolli badan soo galay gurigii Xalimo. Wuxuu cunay oo googooyey gogoshii guriga iyo dharkii Xalimo. Shobto waxba waa ka tariweydey arrintaas. Dabadeed, Xalimo waxay u tagtay nin deriskeeda ahaa oo la oran jirey Cabdi Kulow. Waxay ku tiri «Doolli baa alaabtii oo dhan iga cunay, mukulaashaydiina waxba ka tari wydey ee ila tali». Cabdi Kulow wuxuu ku yiri «Mukulaasha habeenki qadi oo cunto ha siin, markay gaajooto ayadaa danteeda kaa taqaan oo layn doonta doolligee.»

Xalimo sidii Cabdi ku la taliyey markii ay yeeshay, ayaa Shobto laysay oo cuntay doolligii.

Sidaas baana doolligii gurigii looga waayey oo alaabtii Xalimo kaddib ku nabad gashay. Mukulaashu wax waa tartaa, kolkolse guryaha tuugo bay ku noqotaa.

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Bahalka guryaha gala ee dharka iyo alaabta kaleba cuna maxaa la yiraahdaa?
2. Mukulaashii Xalimo maxaa la oran jirey?
3. Mukulaashu intee magac bay leedahay?
4. Cabdi Kulow muxuu kula taliyey Xalimo?

## Casharka 18

## QAANGAARKA

Somalida iyo dadka kale ee muslinka ah qaangaarkooda diiniga ahi waa 15 sannadood. Dad kasta wuxuu gooni u sii leeyahay qaangaar aan diini ahayn oo xeerkooda waafaqsan.

Qof kasta oo muslin ah markuu qaangaaro waxaa ku waajib ah soon iyo salaad. Waalidkii dhalayna waxaa ka wareega xilkii ka saarraa korintiisa iyo koolkoolintiisa. Waxaa qaangaarka waajib ku ah inuu waalidkiisa dhawraa, ugana abaalgudaa dhibaatadii laga soo maray korintiisa. Hagaaggu wuxuu yahay qofka waxgaradka ah inuu marka hore naftiisa ka adkaado, kaddibna waalidkiis u samafalo, dabadeedna, waddankiisa iyo dadka

kale intii u baahan taageero intii tabartiisa ah. Sidaasna waxaa lagu gaaraa shaqo iyo waxbarasho.

**Layli:**

**Jawaabta qaar sheeg qaarna qor.**

1. Adigu weli qaangaar ma tahay?
2. Intee qaangaar lagu **noqdaa?**
3. Qofku markuu qaangaar noqdo maxaa ku waajibey inuu qabto?

## Casharka 19



**RAADIYAHA**

Doowlad walba waxaa ku waajib ah inay waddankeeda u samayso raadiyo, si ay u faafiso wax kasta oo dadka iyo dalka wanaaggooda keeni kara.

Raadiyuhu waa dhawr jaad. Mid waa kan warka sii daaya oo hawada u tebiya, midna waa kan warka ka qabta hirarka sare ee hawada. Waxaa kale oo jira mid ku tusa muuqaasha qofka ku hadlaya ama meesha uu joogo iyo dadka la jooga oo dhan. Isla markaas codkoodana waad ka maqli kartaa. Midkan dambe waxaa lagu magacaabaa «Telefishan». Isaga dhowaan baa la hindisey oo dal walba lagama helo.

Guri, makhaayad iyo baar walba waxaa dhex yaal raadiyo. Raadiyaha waxaa loo iibsadaa in la ogaado waxa addunyada ka dhacaya.

Barnaamijka iyo qaynuunnada dawladdu ay soo saarto baa laga maqlaa telefishanka, afka shisheeyahana waa laga bartaa. Muusika, heello, gabay iyo cayaaro kala duwan oo la jeclaysto baa laga maqlaa. Mararka qaarkoodna tacliin iyo haasaawe ama hadal xiisa leh baa laga dhegeystaa.

Layli:

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Raadiyuhu muxuu na taraa?
2. Ka warran inta jaad oo raadiyuhu u kala baxo.
3. Reer miyigu ma haystaan raadiyo?

## Casharka 20

## DUKAANKII LIBAN

Imtixaankii dhawaa markaan si fiican u shaqeeyey ee aan ku liibaanay, baa aabbahay ii waday magaalada si uu dhar wanaagsan iigu soo gado. Wuxuuna i geeyey dukaan weyn oo uu lahaa nin la yiraahdo «Liban Yalax.

Dukaanka waxaa yiil dhar kala j a a d ah iyo alaabo kale oo qurux badan. Dukaanka alaabtiisu si wanaagsan oo qurux leh bay ugu rasaysnayd meelo loo sameeyey oo muraayadi ku daboolan tahay. Dukaanka Liban wuxuu lahaa miis dheer oo xagga hore yaal. Marba shaygii la dalbado, baa la soo dul saarayey miiska.

Dukaanka Liban wuu nadiifsanaa oo diqsi ma lahayn. Dad badan ayaana ku jirey oo wax ka iibsanayey. Anigu markaan daawashadii dukaanka ka dhergey baa aabbahay i tusay saraawiil iyo shaatiyo badan. Wuxuuna i weydiiyey inaan shaati iyo surwaal ka doorto. Labadii aan jeclaystay markaan la baxay, baa aabbahay lacagtii bixiyey. Markaasaa Liban yiri «Mahadsanid». aabbahayna «adaa mudan».

Dabadeed dharkii la ii gaday baan qaatay oo guri gayagii baannu ku soo laabannay.

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Ardaygu yuu raacay?
2. Dukaanka Liban maxaa yiil?
3. Ardaygii maxaa loo gaday?
4. Maxaa ardaga dharka loogu gaday?



## WARSHADDA HILIBKA

Waddankeenna tobankii sano ee aan soo dhaafnay tallaabo la garan karo buu xagga warshadaha ka qaaday.

Warshadahaas waxaa ka mid ah warshadda hilibka oo ku taal degmada Kismanyood iyo midda Xamar.

Warshadi maxay ku noolaataa? Waxay ku noolaan kartaa saddex waxyaalood: midda u horraysa waa inayan waayin alaabta shaqadeedu ku socoto. Midda labaad waa inay leedahay dad hawsheeda dhab u yaqaan. Midda saddexaad waa inay heli karto dad ama dalal ka gata waxay soo saarto.

Warshadda hilibka ee Kismanyood saddexdaas waxyaaloodba way wada leedahay. Gobolka Jubbada

hoose waa nalka ugu lo' badan waddankeenna Sidaas daraadeed, marna lagama waayo hilib. Dad Somali ah oo si fiican wax u yaqaan baa ka shaqeeya warshadda. Dalal aan saaxiib nahay oo inaga qaata hilbahana way jiraan.

Warshadda Kismaanyood waxay shaqo bilowday 1967. Waxayna samaysaa hilib dhawr jaad ah: mid karsan, mid shiidan, mid sanuunad leh iyo kuwo kale; waxaana ka shaqeeya dad badan oo rag iyo haweenba leh. Maalintii waxay soo saartaa in ka badan konton Kun o daasadood oo hilib ah. Waxaa yimaada waddankenna maraakiib badan oo ka rarata dakadda Kismaanyood iyo tan Xamarba sanduuqyo badan oo hilib ah.

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Warshadi maxay ku noolaan kartaa?
2. Ka warran warshadda hilibka ee Kismanyood: goortee la dhisay? Maxayse samaysaa?

> «...Waa inaynu dhalinnaa ummad ku dhisan mabaadi'da sinnaanshaha, caddaaladda iyo horukaca.»
> Jaalle Maxamad Siyad Barre, Madaxweynaha Jamhuriyadda Somaliya (30 Octobar 1971).

## Casharka 22

### Hanaddadiyow Horuu wada

(Hees Waddani ah)

Dadka oo heshiiyoo isku hooyo mooddoo
Isu hilooboo isu hiillinaaya
Isu hura naftooda hataqda iska eega
Haddaad noo horseeddeen
Hanaddadiyow horuu wada
Hawlkar inaad tihiin layskuma hayee
Hoyga noloshu waa hantiwdaaggee
Halista ka dhowra
Hareerihiinnana hiil iyo hooba
Nagu halleeyoo na hoggaansha

**Sicid** Xarawo

### MA IS RAACI KARAN?

(Geeraar)

Senge raaxa wanaagsan
nin rakaabki ku jooga
oon marna ruugga ka qaadin
marna soo ritiqlayn
iyo nin dameer la ruquusay
ma is raaci karaan;
jiilaal meeluu ku raagey
ee cirka roob laga waayey
ninkay raaxad u foofi
oo ramad looga lisaayo
iyo nin adduun rì ka haysta
ma is raci karaan?

Farax Shuriye

## Casharka 23

## FAL AMARKA

**Fal amarka af Somaligu wuxuu u kala baxaa sidan hoos ku qoran.**

**Fal amar ku dhammaada shibbane, sida:**

| | |
|---|---|
| cun | dabool |
| qor | furfur |
| gub | dabar |
| qod | cayaar |
| hel | boodbood |
| dil | hurud |


**Fal amar ku dhammaada shaqalka «i», sida:**

| | |
|---|---|
| celi | fariisi |
| kari | kibri |
| badi | ballami |
| deji | fiiji |
| fadhi | hagaaji |
| bixi | raaji |

**Fal amar ku dhammaada shaqalka «o», sida:**

| | |
|---|---|
| qabo | cabso |
| baro | dhiso |
| hoyo | qabso |
| noqo | mayro |
| soco | qaado |
| qoro | seexo |

**Waxaa ardayga looga digayaa inuu sii ogaado inaan fal amarku intaan ku koobnayn.**




## BEERTA UBAXA IYO MIDDA XOOLAHA

Haddaad tagtid magaalo, ha yaraato ama ha weynaatee, waxaad ku arkaysaa meelo qurqurxoon oo doog badan oo dadku ay fariistaan. Meelahaas waxaa lagu magacaabaa «Beeraha Ubaxa». Waxaa jira beero kale oo kuwaas aan la mid ahayn, waxaana la yiraahdaa «Beeraha Xoolaha». Waxaad ku dhex arki kartaa dugaag geddisan, halaq kala jaad ah iyo shimbiro tiro badan oo qaarkood aad u qurxoon yihiin.

Maxay taraan beerahaasi? Beeraha ubuxu magaaladа qurux bay u kordhiyaan, dadku galabtii ama fiidkii bay u soo baxaan oo fariistaan, oo kaga nastaan hawshii iyo nooggii ay soo mareen maalintii. Qofkii damca wax buu

ku akhristaa ama radiyaha buu ka dhegeystaa. Beerta Xoolahana waxaa laga bartaa waxyaalo badan oo qofku uusan weligiis arkeen. Macallinku mararka qaar-kood, hadduu rabo inuu ardada aad u dhacsiiyo cashar ku saabsan xayawaan, jaad kasta ha ahaadee, wuxuu geeyaa beerta Xoolaha, si ardadu run ahaan ay u aragto dugaag-ga ama shimbiraha casharkoodu ka hadlayo.

Dalka ama magaalooyinka loogama maarmo inay leeyihiin beero ubax iyo kuwo Xoolaad. Dalkii ay ku badan yihiin beerahaasi waxaa la dhihi karaa inuu tallaabo weyn ka qaaday xagga horumarka iyo noolosha guud. Sidaas daraaddeed, dawladda iyo reer magaalkuba waxay weligood ku dudaalaan inay sameeyaan beeraha nasashada iyo kuwa daawashada.

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Magaaladiinna immisaa beer ubax ku taal?
2. Waxaad qortaa meeshaad ku taqaan beer xoolaad.

## Casharka 25

## FASALKA DUGSIYADA

Sannad walba dugsiyada waa la xiraa markuu dham-maado waqtigii waxbarashadu. Inta dugsigu xiran ya-hay, ardayda qaar miyiga bay aadaan, qaar beeraha ay ka shaqeeyaan, qaar magaalooyinka bay iska joogaan.

Ardada marka dugsiga laga xiro ee la fasaxo, qaar baa mooda in hawl oo dhan laga fasaxay oo aan waxba

qaban ee iska cayaara. Qaarna waalidkood bay kaalmee-yaan oo hawsha la qabtaan.

Waxbarashadu kuma koobna inta dugsiga la joogo oo keli ah, ee meel kasta oo la joogo waxaa loo baahan yahay in wax la barto. Ardadu intay dugsiga joogaan iyo markuu xiran yahayba waa inayan gacmaha laaban ee ka shaqeeyaan guryahooda iyo dugsiyadooda. Ardadu waa inay ka qayb galaan oo gacan weyn ka geystaan mashaariicda horumarka leh oo waddanka laga qabanayo. Shaqo wanaagsan iyo dadaal badan ayaa dadka gaarsiiya bash-bash iyo barwaaqo.

**Layli:**

**Erayadan magac ka dhig.**

1. Xir, cayaar, shaqee, joog, bar, baro, fasax.

## Casharka 26



**JEERTA**

Waa maxay jeertu? Xaggeese ku nooshahay? Jeertu waxay ka mid tahay nafleyda waaweyn. Waxayna muu-

qaalka hore uga eg tahay doofaarka. Hase yeeshee, faanaha (foolasha) dhaadheer ee doofaarku leeyahay ma qabto. Jeertu waxay leedahay afar lugood oo gaagaaban iyo calool weyn. Waxay kaloo leedahay laba dhegood iyo laba indhood oo yaryar. Waxay kaloo leedahay san gaaban oo ay wax ku ursato iyo af ballaaran oo ay ku daaqdo. Waxay kaloo leedahay harag adag oo culus oo aan dhogor badnayn.

Jeertu waxay ku nooshahay webiyaasha iyo agahooda. Badanaa biyaha webiyaasha ayay ku jirtaa oo ku nooshahay. Habeenkiise dibadda bay uga baxdaa. Markaasay webiga jiinkiisa daaqdaa. Jeertu beeraha webiyaasha u dhow waxyeello bay u geysataa. Waxay cuntaa waxa beeraha ka baxa ee ay ka mid yihiin mooska, galleyda, meseggada iyo waxyaalo kale oo badan.

Jeertu badanaa ma maagto dadka, laakiinse markii laga caraysiiyo wax bay hardidaa oo ku tumataa oo burburisaa. Jeertu ma cunto hilibka dadka, laakin geedaha iyo cawska bay daaqdaa. Weligaa jeer ma aragtay?

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. **Jeertu xaggay ku nooshahay?**
2. **Jeertu maxay beeraha ka cuntaa?**
3. **Jeertu sidee wax u dishaa?**
4. **Jeerta afkeedu intee buu la eg yahay?**
5. **Jeertu goormay webiga ka soo baxdaa?**

## Casharka 27

## CUMAR BIN KHADAAB

Cumar Bin Khadaab wuxuu ahaa khalifkii Nebiga ka dambeeyey ee labaad.

Intuunan Muslimin wuxuu ka mid ahaa kuwa aad iyo aad isu hor taagey Nebiga iyo Islaamka faafiddiisa. Muslimiintana dhib weyn buu u geystey, sidaasaa haddana Nebiga iyo Muslimiinta kaleba ayan ka quusan. Beri dambe ayaa Ilaahay, isagaa qaadir ahe, Cumar laabtiisa iimaanka u furay. Markaasuu Ilaah qiray Nebigiina rumeeyey. Sayiddinaa Cumar kolkuu Muslimay, Muslimiintu si weyn bay ugu farxeen aadna way u dhiirradeen. Kolkii dadkii kufaarta ahaa ay weydiiyeen wuxuu falay, wuxuu ku yiri «Ninkii doonaya inay habartii gob lanto waa kan iiga daba yimaada toggaas». Ka dibna cidi ka ma daba tegin. Sayiddinaa Cumar Nebiga iyo muslimiintuba gacan weyn bay ka heleen, dagaalladii gaalada lala jihaadayeyna wax weyn buu ka geystey. Cumar iyo Abu Bakarba Nebiga waxay u ahaayeen labadiisi gacmood, midig iyo bidix. Sayiddinaa Cumar, Ilaahay ha ka raalli ahaadee, wuxuu ahaa nin xaqa iyo cadaaladda aad u ilaaliya, danaha muslimkana goor kasta u soo jeeda, runtana aan waligiis ka leexan.

**Layli:**

**Ka jawaab adoo qoraya:**

1. Immisay khulafadu ahaayeen?
2. Markuu Cumar Muslimay muxuu u taray Islaamka?
3. Bal wax ka sheeg erayaduu Cumar yiri.

## Casharka 28

## BALLANKA

Ballanka waa tan la yiraahdo «BALLAN LAMA GALO HADDAAD GASHANA LAMA BAAJIYO». Islaanka iyo xeerkeennu waxay qabaan in ballanka la oofiyo oo aan la baajin.

Taas waxaa loola jeedaa dadku hadduu isku ballan furo waa kala aamin baxaa. Hadduu kala aamin baxana waa kala tagaa. Hadduu kala tagana waxaa go'a xiriirkii ka dhexeeyey. Taasi waxay keentaa inaan wax la wada qabsan. Dadku haddii uusan wax wada qabsan oo wax is weydaarsan sina uma noolaan karo.

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Ballanka in la furo ma bannaan tahay?
2. Haddii aadan oofin karin ma geli lahayd ballan?

### MAHMAAHYO

* Libaax nin ganay
  iyo nin u galladayba (kaalmeeyey)
  kala ogsoon (waa kala yaqaan).
* Lama huraan waa
  cawska jiilaal.
* Oodda qaad iyo jiid
  waa isla guri geyn.
* Ilko wadajir bay
  wax ku gooyaan.
* Nin soori qaadday waa
  nin seefi kaa qaadday.



## BEERALEY

Oday Barre la yiraahdo ayaa wuxuu lahaa wiilal badan. Kan u weyn waxaa la oran jirey Bulshale. Wuxuu ahaa beerrey. Wuxuu sahansaday dhul bacrin ah oo hawd leh. Waagii hore dhulku wuxuu lahaa caws, dhir yaryar iyo geedo sare. Cawskii iyo dhirtii yaryarayd waa uu gubey. Geediihi sarana waa uu falay. Dabadeedna Wuu carra geddiyey.

Kolkii carro geddigii u dhammaaday ayuu abuuray. Abuuriddaas kaddib beerta hawsheedu ma badnaa jirin. Toddobaadyo kaddib ayuu limi jirey.

Bulshale beerta wuxuu ka ilaalin jirey wax kasta ee dhibaato u keeni kara dad iyo dugaagba. Kolka ay

mira bixiso wuxuu ka dhicin jirey shimbiraha iyo bahallada kale oo miraha cuna.

Kolka beertu bisfaato ayuu dad isu wici jirey. Sabuullada inta la jaro ayaa meel la tuumin jirey, kaddibna waa la sukuli jirey.

Dabadeed waxa beerta laga helo waxaa loo qaybin jirey saddex meelood: qayb reerka ayuu Bulshale u deyn jirey; qayb waa kaydin jirey oo bakaar ayuu ku shubi jirey; qaybta saddexaadna waa uu safrin jirey oo wuxuu soo siisan jirey dhar, subag, sonkor, iwm.

Bulshale gugii iyo deyrtiiba beerta ayuu beeri jirey. Wuxuu ahaa nin hawsha jecel oo aan nasan. Haddaad u fiirsataan waxa aynu cunayno dad baa sida Bulshale ugu soo dhididay.

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan**

1. Bulshale ma u yaraa ilmaha Barre mase waa u weynaa?
2. shaqadee doortay Bulshale?

## Casharka 30

## WILWAL

Wilwal wuxuu ahaa nin garaad ah oo Somalida Jigjiga ka mid ah. Wuxuu ahaa nin geesi ah aadna u laaya shisheeyaha. Ha yeeshee, Somalida nafteeda ninkii xukunkiisa maqli waaya wuu dili jirey. Sidaa daraadeed wuxuu ahaa nin laga baqo.

Wilwal qofka keliya ee uu ka xishoon jirey wuxuu ahaa afadiisa oo la oran jirey, «Cambaro». Iyada ayaa marka raggu ka baqo u tegi jirtey oo oran jirtey «Wilwal, kacoo ragga waxaas iyo waxaas u qabo». Markaasuu oran jirey: «Waa tahay». Sababtu waxay ahayd haweeneyda ayaa gaari ahayd wuuna jeclaa.

Wilwal wuxuu ahaa nin geesi ah, dadka degmadaas ku noolaa waxay u aqoonsanaayeen inuu yahay ninka keliya oo shisheeyaha laga dugsan karo oo nabad gelin kara xoolahooda iyo naftooda. Wilwal wuxuu ahaa gabayaa caaddil ah. Diinta Islaamkana aqon weyn ayuu u lahaa, laakin waxaa dhibaatooyinkiisa ka mid ahaa: Ninna lama tashan jirin.

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Wilwal dalkee u talin jirey?
2. Yuu wax ka maqli jirey, maxaana u sabab ahaa?
3. Wanaaggiisi iyo dhibaatooyinkiisi wax ka sheeg?

## Casharka 31

## FAAL

Faalka iyo maryamadu waa tabo loola jeedo in lagu ogaado waxyaalo aan la hubin. Faalku waa tiro midba in tahay oo loo dhigo siyaalo kala duwan. Waxayaalaha lugu faaliyo waxaa ka mid ah tusbaxa, quruuraxa, ama xarriiqimo dhulka lagu dhigo. Maryamadu waa kuusha haweenka ama dhiil yar oo la lulo ama la weeraamiyo.

Waxaa la arkaa inuu qof ku dhaco cudur faalkiisa la waayey. Waxaa kaloo la arkaa in loo doono nin u faaliya ama habar u maryamaysa. Inta badan faalka iyo mar-

yamaduba waxay sheegaan wax qofka buka u roon. Maxay ku noqotay? Waxay ku noqotay qofka faalka ama maryamada yaqaani waa ku xoogsadaa. Kolka haddduu sheego wax qofka buka ka nixiya, wuxuu ka baqayaa inaan wax la siin.

Badanaa kuwa faaliyaa dadka wax u keensada been bay ku maaweeliyaan. Waxaa suurowda qofka inuu hayo cudur fudud oo qalid u baahan sida kolonta caloosha ku taal. Kolonta waxaa ku filan in qofka buka la jeexo oo laga gooyo. Waxaa suurowda in faalshowgu yiraahdo qofka waxaa u dawo ah orgi cad oo afarta qoob ka madow oo inta fiidkii la qalo dhiigga iyo uuska la mariyo qofka. Waxaa la yiraahdaa nin buka boqol u talisay.


Waxaa la arkaa in orgigii la helo oo dhiigiisa iyo uuska la mariyo qofka buka. Isla kolkaas waxaa suurowda in qofkaa inta kolontii ku diliaacdo naftu ka baxdo. Haddii faaliyaha la weydiiyo maxaa dhiiggii iyo uuskii wax u tari waayeen, waxaa suurtowda inuu yiraahdo qofkii gawracay ayaa biti darraa.

Bal u fiirsada, maxaa isugu jira bugtada kolonta iyo orgiga cad oo qoobabka madow iyo biti darrada qofka orgiga gawracay?

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Haddii aad jirratid yaad daawo ugu tegi lahayd faalshowga, mise taqtarka?
2. Ma rumaysan lahayd wuxuu kuu sheego faalshowgu?



## LIBAAXA

Libaaxu wuxuu ka mid yahay nafleyda waaweyn ee halista ah. Libaaxu wuxuu leeyahay af weyn oo ballaaran iyo miciyo dhaadheer, waxaana la yiraa waa boqorkii dugaagga. Wuxuu kaloo leeyahay laba indhood oo cascas iyo afar cagood oo ciddiyo dhaadheer leh. Ciddiyahaas buu wax ku qabsadaa oo ku dilaa. Wuxuu kaloo leeyahay dabo dheer oo xagga dambe sayin ku leh. Libaaxu qaarka hore waa u weyn yahay, qaarka dambana waa u yar yahay.

Libaaxa kan lab waxaa la yiraahdaa **«aar».** Qaarka hore wuxuu ku leeyahay gas badan. Kan dheddigna waxaa la yiraahdaa **«gool».** Gooshu sida aarka uma gas badna. Libaaxa dhashiisa yaryar waxaa la yiraahdaa «cagabaruur». Markay aad u yaryar yihiin waxay u eg yihiin mukulaasha.

Libaaxu wuxuu ka mid yahay nafleyda duur joogta ah. Wuxuuna cunaa ugaarta, xoolaha iyo wixii kale ee uu helo. Libaaxa qaarkiis dadkuu cunaa oo waxaa la yiraahdaa **«dadqaad»**. Libaaxu badanaa maalintii wuu nastaa, habeenkiina wuxuu raadsadaa wax uu cuno. Libaaxu waa bahal xoog badan oo bootin dheer.

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Libaaxu immisa addin buu leeyahay?
2. Libaaxa kan dheddig maxaa la yiraahdaa?
3. Goormaa libaaxu wuxuu cuno raadsadaa?

## Casharka 33

## GALLEY

Galleydu waa geed dhirta la abuuro ka mid ah. Waxayna leedahay caleen balballaaran, balkeeduna wuxuu u eg yahay kan meseggada. Waxayna dhashaa sabuul firi ka baxdo oo caleemi ku duuban tahay.

Firida galleyda adduunka oo dhan baa laga jecel yahay. Waxaana laga sameeyaa burka iyo waxyaalo kale oo fara badan. Somaliya galleydu aad bay uga baxdaa, waxayna ku badan tahay dhulka webiyaasha u dhow. Waagii hore meseggada ayaa Somalidu aad u beeran jirtey haddase waxaa ka fara badan galleyda maxaa yeelay waa ka dheef badan tahay. Xagga beerista, galleydu waa ka dhib yar tahay meseggada, shimbirta ayaa aad u cunta meseggeda, galleydase ma cunto, maxaa yeelay gal baa sabuulkeedu leeyahay.

Inta badan, galleyda waxaa la beeraa guga, deyrtana meseggada. Beeraleyda webiyaasha u dhow gu' iyo

deyrba way beeraan galleyda. Waxaa la yiri, nin beeraley ah mar uu la hadlay galleyda wuxuu yiri, «Galley! Maxaad rabtaa oo kuu daran?» Galleydii waxay tiri. «Waxaa ii daran biyo badan, falid badan iyo dhawrid badan.» Qofkii raba inuu galley abuurto, waa inuu waarabinteeda, faliddeeda iyo dhawriddeedaba ku dadaalaa. Haddii kale khasaaro weyn buu la kulmaa.

**Layli:**

**Erayadan weero ku dar.**

1. Galley, meseggo, abuur, iniino, firi.

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Waxaad sheeko gaaban ka qortaa sida galleyda loo beero.
2. Abuuridda galleyda iyo meseggada tee dhib badan?

## Casharka 34

## DHARKA

Waagii hore haddii la qaawanaan jirey, ama dhuu (dhugi) la xiran jirey, haatan waxaa la qaataa dhar badan oo kala jaad ah.

Wàa dhexe raggu wuxuu qaadan jirey labo go', haweenkuna marsiino (guntiino), haddase waxay ku soo hareen rer miyiga qaarkood. Saatan waxaa miyi iyo magaalaba gaaray dhar kala jaad ah oo dibadda laga keenay, lana socda farsamada casriga ah. Dharka Somalida qaarba meel buu ka yimid: qaar reer **galbeed**, qaar **Hindiya,** qaarna **Carabta.** Maanta Somali isku dhar

xiran way yar tahay. Waagii hore waxaynu lahaan jirney kabo korka ka furan oo suuman **aslan** leh iyo **indhal** (suun jilicsan) oo cagaha ka dhexeeya (bidix iyo midigba) oo raggu qaato. Kuwa haweenku waxay ahaan jireen kuwa gafuur dheer oo kor u jeeda leh oo cirib ballaaran. Sida loo xardhay ama loo daruuray haba ka ḥadlin. Habsamida socodka iyo laafyaha hablaha si weyn ayay kabahaasi wax ugu tari jireen.

Raggu hadda wuxuu qaataa kabo xiran oo waagii hore qabow loogu talo galay oo aan ku wanaagsanayn dalalka hawadoodu kulushahay. Somalidu waxay jeclaan jirtey inay qaadato dhar aan uskag lahayn oo qurux badan, maxaa yeelay, waxay jeclaayeen xarragada, waxayna u badnaayeen reer salaadeed.

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Somalidu waagii hore maxay xiran jirtey?
2. Tilmaan dharka aynu hiddaha u leennahay.

## Casharka 35

## MOWLIID

Mowliid waxaa la yiraahdaa xuska dhalashada Nebigeenna, naxariis iyo nabadgelyo Ilaahay korkiisa ha yeelee. Waxay ku abbaaran tahay bilaha dayaxa tan saddexaad toban iyo labadeeda. Bisha seddexaad lafteeda Somalidu waxay u taqaan Mowliid.

Qof walba oo aadduunka ku nool oo diin lihi wuxuu sheegtaa Nebi, kolkii nebigiisu dhashayna wuu xusaa.

Gaaladu waxay xustaa dhalashadii Nebi Cise, Yuuhuud-duna tii Nebi Muse. Sidoo kale muslinku wuxuu xusaa tii Nebi Muxamad, naxariis iyo nabadgelyo korkiisa Ilaahay ha yeelee.

Dalka Somalida, miyi iyo magaalaba, dhalashada Nebiga aad baa looga xusaa, waxayna ka mid tahay iidaha ummadda Somalida. Meel walba (xafiisyada, guryaha iyo jidadka) waxaa laga taagaa calanka Somalida, hawshna waa laga nastaa. Magaalooyinka waaweyn nalal kala jaadjaad ah ayaa lagu qurxiyaa.

Dadka heli karaa xoolo ayay qalaan, cunto badanna waa la kariyaa si dadka baahan loo quudiyo. Masaajidyada iyo guryahana waa lagu ururaa, waxaa lagu akhriyaa ammaanta Nebiga iyo tilmaamihiisa.

Ammaanta iyo tilmaamaha badidoodu waxay ku qoran yihiin kitaabka Mowliidka.

Kitaabka waxaa loo akhriyaa si wanaagsan, marmarna Nebiga af Somaliga waa lagu ammaanaa.

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Mowliid maxaa la yiraahdaa?
2. Yuhuuddu ma u iidddaa dhalashadii Nebi Muse?
3. Xuska Nebigeennu ma ka mid yahay iidaha ummadda?

## Casharka 36

## BOOLIISKU WAA SAAXIIBKA DADKA

Boolisku waa qofka nabadda ilaaliya. Wuxuuna qabtaa oo xiraa qofkii nabadda wax yeela ama xeerka waddanka jebiya.

Haddii miyi iyo magaalaba nabadi jiri lahayd oo dadku is nabad gelin lahaa, booliska looma baahdeen.

Haddii qof wax dilo ama wax xado ama dembi kale sameeyo, booliska ayaa raadiya oo soo qabta. Kolkaas baa qof walba dembigii uu falay lagu qaadaa. Magaalooyinka waaweyn waxaa jooga boolis badan oo habeen iyo maalinba shaqeeya. Wuxuuna u soo jeedaa oo u hawshoodaa inuu qabto qofkii nabadda wax yeelaya. Waxaad arkaysaa habeen barki waqtiga dadku hurdo isagoo soo jeeda oo magaalooyinka ilaalinaya.

Sidaas aawadeed, qof waliba waa inuu booliska xushmeeyaa oo uu kaalmeeyaa markuu u baahdaba, si uu hawshiisa si wacan ugu fushado. Haddii ay wax ku gaaraan, amase aad aragtid qof nabadda jebinaya, waa inaad si degdeg ah ugu sheegtaa booliska.

**Boolisku waa saaxiibka qofka wanaagsan, waana cadawga qofka xun!**

**Layli:**

**Erayadan weero ka samee.**

1. qabtaa, boolis, askari, shaqaale.
2. Waxaad qortaa afar hawlood oo boolisku qabto iyo afar hawlood oo ardadu qabato.

## Casharka 37



### MAROODIGA

Maroodigu waa nafley aad u weyn, jirkiisu wuu adag yahay jilfana wuu leeyahay oo waxba kama tari karaan warmaha iyo seefuhu. Maroodigu wuxuu ku nool yahay meelaha webiyaasha ama balliyaasha badan leh ee dalalka hawada kulul. Maroodigu intuu yar yahay haddii la qabto waxaa laga dhigi karaa dabjoog, sida kuwa jooga dalka Hindiya iyo **sarriibadaha** nafleyda. Maroodigu waa ku badan yahay dalkeenna, ha yeeshee dadka wuu laayaa haddii laga caraysiiyo, beerahana waa daaqaa oo balka, haruurka iyo galleydaba lagama soo gaaro oo waa dhammeeyaa.

Xeerka dalkeennu ma oggola in la laayo maroodiga haddii aan loo haysan ruqsad. Ninkii dila maroodiga ruqsad la'aan waa la ganaaxaa, waana la xiraa.

Haddayan dawladdu sidaas yeelin, muddo yar baa laga dhammeyn lahaa dalka.

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Tilmaan maroodiga, dalkeennase ma ku nool yahay?
2. Maroodiga dalkeenna ma lagu shaqaysan karaa?
3. Dawladdu maxay u diidday in la ugaarsado maroodiga? Ninkii dilase maxaa lagu sameeyaa?

## Casharka 38

## SANAN (BITI DARAN)

Arbaca bil u dambaysa reerka lama raro, waa sanan. Bilaha qaarkood geela lama bixiyo, lamana guursado, waa sanan. Habeenkii cusbada iyo lacagta midna lama bixiyo, waa sanan. Lòda magaalooyinka ku xiran in dhalo cad, oo biyo maanyo ku jiraan, ama ugax goroyo la dul suro waa sanan. Ciddiyaha haddii guriga lagu jaro waa la cayroobaa waa sanan.

Dadka aan aqoonta badan lahayn waxyaalahaas ayay ka baqaan, ama wixi ay aqoon waayaan si kale ayay u fasiraan. Haddii reer maalin arbacaad guuro oo ay tahay maalintii bisha u dambeysay dabadeedna awrtu diddo oo ay haamaha kala goyso, waxaa la arkaa in la yiraahdo haamaha kala goyntooda waxaa ku wacnaa arbacada mugdi u dambeysta ah.

Sida runta ah waxba isugu jiraan awrta didmadeeda iyo arbacada bisha u dambeysa. Hadduu nin waxgarad ahi yimaado oo weydiisto in loo sheego wixii awrta didiyey, waxaa suurowda inuu ogaado in teneg awrta midkood ka soo dhacay oo uu shanqaray, markaana awrtu ka didday.

Haddaba haamaha kala goyntooda waxaa ku wacnaa teneggaas soo dhacay, ee arbcadu uma sabab ahayn.

Haddii wax nagu dhacaan waa inaynu doonnaa oo garannaa wixii runta ahaa oo ku wacnaa. Markaan ogaanno wax walba waxa ku wacan, waxaan kari karnaa in aan ka fogaanno waxyaalaha beenta ah oo sida xun u dhaqan galay.

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Sanan maxaa la yiraahdaa?
2. Meelaha mugdiga ah ma jin baa ku jira mise waa been?
3. Sanada arbacaad reer miyigu ma guuraan?

## Casharka 39

## XEER JEBIN

Galab guri agtiis ido fara badani daaqayaan ayaa duq dallad sitaa meeshii soo maray. Dallladdana qorraxduu ka sitey. Duqii markuu idihii ku soo dhowaadey ayaa dabayl xoog lihi u timid oo dalladdii kala tagtay.

Dabayshii markay dalladdii la tagtay ayaa idihii dideen. Markaasaa duqdii idaha lahayd ul ay sidatey duqii

ku dhufatay dhawr jeer. Duqiina intuu carooday ayuu dharbaaxay naagtii oo dhulka ku tuuray.

Duqdii markay qaylisay ayaa dadkii guriga joogey rag iyo haweenba soo baxeen oo la yaabeen duqii wuxuu falay. Maxaa yeelay, xeerka Somalida kuma jirto in haweenka la garaaco. Hase ahaatee, markii cabbaar la wada hadlay oo wixii gartu ahayd la isu tilmaamay oo duqii la dhacsiiyey siduu uga boodey xeerkii Somalida, ayaa meeshii heeshiis ka dhacay oo duqii aqoonsaday gafkii uu sameeyey.

Laakin, nasiib darro waxaa la waayey dalladdii duqu qorraxda ka sitey.


**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Arigu xaggee buu daaqayey?
2. Duqu muxuu sitey?
3. Duqdii ariga lahayd yaa diley?
4. Markii duqdii qaylisay yaa u soo baxay?
5. Duqii goormuu aqoonsaday gafkiisii?

«...Waxaynu u halgamaynaa dhaqan ku dhisan wadajir, sinnaan, caddaalad iyo horukac. Intaas oo dhammi waxay ku jiraan hannaanka hantiwadaagnimada cilmiga ku dhisan ee aan horukaca dalkeenna u doorannay».

Jaalle Maxamad Siyad Barre, Madaxweynaha Jamhuriyadda Dimoqaradiga Somaliya. (7 Setembar 1971).



## GEEDAQORAHA

Da'da labaad oo Barre waxaa la oran jirey Bile. Kolkii Bulshale beerrey noqday, ayaa Bile wuxuu doortay inuu geedaqore noqdo. Xuxuu ahaa wiil fahma badan oo

aan noogin. Farsama waliba waxay u baahan tahay qof fahmo leh oo aan noogeyn.

Aabbihiis ayuu inta xoolo ka kaxaystay wuxuu soo gatay qalabka geedaha lagu qoro. Bile wuxuu ahaa wiii dhirta aad u yaqaan oo geed kastaa wuxuu ku fiican yahay yaqaan. Koor haddii uu qorayo wuxuu xulan jirey geedaha lebigu ka mid yahay, maxaa yeelay, koorta lebigu waa yeer weyn tahay. Koortu waxay rabtaa carrab (qud) sida birta u adag oo ka dhawaajiya. Dhirta uu koorta carrabka (qudka) uga dhigi jirey waxaa ka mid ah shillinka iyo dhafaruurta.

Bile wuxuu qori jirey ulaha xarragada iyo kooraha geela. Giddigood waa wada xardhi jirey oo aad buu u far qurux badnaa. Waxaa looga dambeyn jirey qoridda huuriyaasha, bedemada iyo doonyaha.

Bile alaabtaas uu qoro ayuu sii iibsan jirey oo wax walba siisan jirey. Waxay la ahayd dadka inuu ugu fiican yahay ninkii wax qora.

Waagii hore aadanuhu geedaha waa shidan jirey waxna waa ku oodan jirey. Wàa dambe ayuu awood u yeeshay inuu hub iyo alaab kala jaadjaad ah ka samaysto.

Bile wuxuu ka mid ahaa aadanaha geedaha layliyey.

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Geeduhu maxay dadka u taraan?
2. Geedaqoriddu maxay waxtarmo leedahay?
3. Geedaha Bile muxuu ka samayn jirey?

## Casharka 41

## MINGIS IYO WADAADDO

Sida faalka iyo maryamaha, waxyaalaha beenta ah oo dadka lagu dago waxaa ka mid ah Mingiska iyo Wadaaddada. Mingiska dadka waa loo cayaaraa wadaaddadana foox ayaa loo shidaa waana la udgiyaa. Ha ahaatee, haddii qofka buka aan wax laga qaadan ee loo cayaaro ama la udgiyo waxba kuma jabnaadeen. Waxyeellada weyni waa qofkii bukay oo la dhaco, haddii loo cayaarana uu raysan waayo.

Kolkol waxaa dhaca inay bukato naag uu qabo nin aan wax haysan ama ku dukaan ama makhaayad yar len. Waxaa dhacda in habari u timaado naagtii oo tiraahdo «naa mingis baa ku haya.. Mingisku wuxuu rabaa in lagu cayaaro dhawr kun oo shilin.» waxaa dhici kara inaan ninka lacagtiisuba gaarin inta habartu sheegtay. Waxaa in badan dhacda in naagtu ninkeeda tiraahdo haddii aadan mingiska iga tumin ima jeclid.

Arrintu kolkay halkaas gaarto, laba ayay mid noqotaa: Inuu ninku wixii uu haystey b i x i y o oo cayroobo dabadeedna naagta iyo carruurta wuxuu siiyo waayo. Waxaa wehelisa inaan naagtiiba raysan maxaa yeelay mingisku cudur jira ma aha. Tan kale waa ninkoo diidaa inuu lacagta bixiyo. Waxaa ku xigta in naagtii bugtay carooto oo ay reerka ka tagto oo carruurtii **rajiso.** (*) Markaas ninkii waxaa ku dhacda laba daran mid dooro.

---

(*) **Rajo:** waa canug nuujin iyo hooyo waayey.

Dhammaanteen waxaa nala gudboon inaynu beeninno oo la dagaallanno mingiska, wadaaddaha, booranaha iyo wixii aan jirin oo dhan oo laysku siro.

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Mingiska iyo Wadaaddaha ma rumaysan tahay?
2. Haddii aad jirratid, mingis iyo wadaaddo in laguu cayaaro ma oggolaan lahayd?


## Casharka 42

## FAL MA EBYANE

U fiirso sida fal ma ebyanuhu u shaqeeyo

| | |
|---|---|
| Anigu waan **i**mid | Anigu Somali waan **a**hay |
| Adigu waad **t**imid | Adigu Somali waad **t**ahay |
| Isagu wuu **y**imid | Isagu Somali wuu **y**ahay |
| Iyadu way **t**imid | Iyadu Somali way **t**ahay |
| Annagu waan **n**imid | Annagu Somali waannu **n**ahay |
| Innagu waan **n**imid | Innagu Somali waynu **n**ahay |
| Idinku waad **t**imaaddeen | Idinku Somali waad **t**ihiin |
| Ayagu way **y**imaadeen | Ayagu Somali way **y**ihiin |

| | |
|---|---|
| Waynu **n**aqaan | Waan **a**qaan |
| Waannu **n**aqaan | Waad **t**aqaan |
| waad **t**aqaanniin | Way **t**aqaan |
| Way **y**aqaanniin | Wuu **y**aqaan |



## REER MIYIGA

Dadka Somaliyeed saddex meelood labo waxay ku nool yihiin miyiga. Reer miyigu waxay u kala baxaan labo qaybood: Mid waa xoolaley, midda kalena waa beeraley. Xoolaleydu waxay noloshooda kala kulmaan dhibaatooyin badan, sababta oo ah dalka qaarkiis oo biyo yar. Sanada inteeda badan iyagu, had iyo goor waa guurguuraan, si ay xoolahooda naq, caws iyo biyo ugu helaan.

Hawsha reer miyigu waa kala qaybsan tahay: Raggu waa sahamiyaa, waa dhaamiyaa, xoolaha buu oodaa, waana waraabiyaa, ishkinta buu ilaaliyaa, reerkana waa u safriyaa. Haweenku ariga bay raacaan, waa lisaan, caanahana waa lulaan oo subag bay ka soo saaraan.

Waxaa kale oo haweenka u gooni ah aqallada dhismahooda, haamaha iyo dhiilaha toliddooda ama culiddooda iyo carruurta hayntеeda.

Reer miyigu waa ka caafimaad badan yihiin reer magaalaha, sababta oo ah iyagu waxay ku nool yihiin hawo furan, ciid cusub iyo dhir udgoon.

Socodka iyo hawsha badan daraaddeed reer miyigu waa ka adkaysi badan yahay reer magaalaha.

Waxayaalaha lagu dhaqmo qaarkood xoolaleyda waxay u yihiin lagama maarmaan, waxaana ka mid ah:

Aqal, udub, dhig, raar, jarco, xarig, derin, dhafar, cayn, hoggaan, hangool, kabaal, kebed, mudac, maxaar, dhiil, dheri, fandhaal, xeero, xurbin, kalax, haruub, qufad, haan, wadaan, dar, waran, fallaar, qaanso, qori (bunduq), bur, garruun, toorrey, billaawe, godin, mindi, mandiil (maliindo), lool (yahan), seef, masaar, faas, iyo kuwo kale.

**Layli:**

**Erayadan weero ku dar.**

1. Saddex meelood, inteeda, xoolo, nool, miyi.

**Erayadan waxa ka maqan ku dar.**

2. a) Hawsha reer——— ———qaybsan tahay, Haweenku ——————— raacaan, ragguna geela iyo——————— raacaan.

## Casharka 44

## GEESINNIMO

Ardayga maalin kasta taga dugsiga, casharkana dhigta oo maalinta jitaabinta baqdin la'aan ku gala, kaasu waa arday geesi ah. Waxaa kaloo geesi ah qofka ilma yar, ama nin weynba ka saara meel gubanaysa, amase qofka ka nabad geliya wiil ama gabar meel biyo leh markuu hafanayo. Intaas waxaa raaca qofka qabta nin tuug ah oo booliska u dhiiba, kaasuna waa geesi. Kan kale oo geesiga ah waa askariga ku dhiirrada goobta dagaalku ka socdo oo aad uga qayb qaata. Geesinnimadu intaas oo keliya ma aha. Qofka runta sheega oo aan ka leexan, kaasuna waa geesi. Haddaad qaadato casharro badan ama beer falaysid oo aad marka hore wax samayn kari weydid, geesinnimadu waa inaad mar labaad ama mar saddexaad ku noqotaa intaad guul ka gaaraysid.
**Geesinnimadu meelo badan bay ku jirtaa ee ogow!**

**Layli:**

**Erayadan weero ku dar.**

1. dugsi, jitaabi, baqdin la'aan, ka leexo.
2. Geesinnimadu meelahay ku jirto bal wax ka sheeg.

Casharka 45

## DHARBAAXADII DHURWAAGA KU DHACDAY

Waxaa la yiri beri baa habardugaag duushay. Waxay heleen awr koron ah. Kolkaasay disheen oo hareeraha ka fariisteen si hilbihiisa loo qaybsado.

Libaax oo ah boqorka dugaagta ayaa golihii isa soo taagay. Kolkaasuu is kala jiidey oo gilgishay oo ciddiyihii la soo baxay, kaddibna dhulka ku jeexjeexay. Markuu cabbaar caynkaas ahaa, ayuu dabadeed dhurwaa ku yiri, «Hilbaha habardugaag u qaybi».

Dhurwaagii oo cabsanaya baa soo hadaafay isagoo kolba hareerihiisa eegaya oo hilibkii is kor taagey. Markuu cabbaar fiiriyey buu isagoo gariiraya libaaxi ag tegey oo ku yiri, «Hilbaha bar waxaa leh libaaxa, barka kalena wuxuu ka dhexeeyaa habardugaag oo dhan».

Intaas markuu dhurwaagii yiri oo uunan weli fariisan, ayaa libaaxii dharbaaxo la yaqaan ku dhuftay dhurwaagii oo il ka soo tuuray. Dhurwaagi oo ishii laalaadinaya ayaa meel fariistay.

Markii taasi dhacday, baa libaaxii, oo aad uga caraysan qaybtii dhurwaaga, u yeeray dawaco oo ku yiri, «Bal adna waxay kula tahay sheeg».

Dawacadii intay mashxarad la yaqaan ku dhufatay bay waxay tiri «Bal marka hore, laba bar u kala dhig hilibka, bar waxaa iska leh libaaxa, barka kalena laba waaxood ka dhig, waax libaaxaa iska leh ........»

Markaasuu libaaxii intuu kacay si fiicaan u ciyey oo dhoosha ka qoslay il raxmad leh dawacadii ku eegay isagoo leh «Dawaco, waax baa dhimman! . . . . . .».

Dawacadii oo hadalkii aan weli dhammayn baa tiri «boqorow waaxda kalena bal laba fallar ka dhig oo fallar libaaxaa leh». Libaaxiibaa soo kacay oo markiiba yiri, «Fallar baa soo haray».

Dawacadii baa iyadoo qoslaysa tiri, «fallarka soo haray bal laba rimic ka dhig oo rimic libaaxaa iska leh».

Libaaxii baa kaddib is hayn kari waayey. Kolkaasuu ciyey oo ciyey oo dabadeedna golihii ku soo wareegey isagoo guuxaya oo gurxamaya. Kolkuu fariistay buu dawacadii ku yiri «rimic baa haray».

Wawacadii baa intay aad u dhugatay habardugaaggii kale, tiri: «rimica soo haray bal laba miil ka dhig, oo miil libaaxaa leh».

Libaaxii qaybtii isagoo si weyn ugu faraxsan ayuu soo kacay oo dawacadii madaxa u salaaxay, habardugaagna u guuxay oo madaxa u ruxay.

Intaa kaddib, ayaa libaaxii oo aan intii yarayd ee hilibka ka hartay weli ka quusan kacay oo dawacadii ku yiri miilka haray sidee baa loo geli doonaa»?

Dawacadii oo madaxa ruxaysa ayaa tiri, «Waa arrin fudud taasuna, habardugaagga kale u tuur ha isku kor fuulaanee».

Libaaxii taladaas wuu ka yeelay dawacadii. Kolkaasuu ku yiri:

«Habardugaag u sheeg wixii qaybtaas fiican ku baray». Dawacadii oo hoosta ka qoslaysa baa tiri, «Waxaa i baray, isha ka lulata dhurwaaga».

Markay intaas dawacadii tiri baa habardugaaggii kale iska aamustay oo meel fariisatay.


**Layli:**

**Erayadan weero ku dar.**

1. Dugaag, hadaafaa, rimic, ciyey, jeexjeexay, iskala jiidey, is kala bixiyey, eegay, kacay, rimic.

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Maxaa habardugaag meesha isugu keenay?
2. Dhurwaagii maxaa ku dhacay?
3. Dawacadii immisa qaybood bay ka dhigtay hilibkii?
4. Qaybtii dawacadu siday ahayd?



## AYAXA

Ayuxu wuxuuu dhalaa ukun, intuu dhulka qodo ayuu wuxuu leeyahay afar baal oo uu ku duulo.

Ayuxu wuxuu dhalaa ukun, intuu dhulka qodo ayuuna ku aasaa oo ka tagaa. Markiibana wuxuu dhalaa ukun boqollaal ka badan. Ukuntu markay laba toddobaad joogto, ayay koronkoro noqotaa oo dibadda u soo baxdaa. Koronkoradu way yaryar tahay, midabkeeduna waa baroormadow, baalalna ma leh. Hase yeeshee, markay weynaato baa baalashu u soo baxaan oo markaasay ayax noqotaa.

Ayuxu wuxuu leeyahay midabyo badan oo ka kooban cagaar, guduud iyo giirgiir. Habeenkii ayuxu ma duulo ee dhirta ayuu fuulaa oo cagaarka ka cunaa. Ayaxa iyo koronkoraduba waa cayayaan dhibaato weyn u geysta beeraha, dhirta iyo daaqa kale.

Beeraleydu aad bay uga baqdaa. Dabadeed si beeraha looga nabad geliyo dhibaatada ayaxa, waxaa la sameeyay laan ka mid ah Ummadaha Midoobey oo ayaxa la dagaallanta. Ayaxu markuu qaxo wuxuu socdaa masaafooyin badan, si hawl yarna wuu uga tallaabi karaa badaha iyo buuraha.

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Ayuxu muxuu dhalaa?
2. Immisaa baal baa ayuxu leeyahay?
3. Sidee baa ayuxu dadka wax u yeelaa?
4. Ayaxa sidee bay Ummadaha Midoobey ula diriraan?

## Casharka 47

## BIRTUMAHA

Kolkii curadkii Barre beerrey noqday, curad xigeenkiina geedaqore noqday, ayaa Kerow oo da'dii saddexaad ahi wuxuu goostay inuu birtume noqdo.

Kolkii uu bartay sida birta loo tumo, ayuu soo qaatay maar, macdan, bir iyo rasaas. Wuxuu kaloo soo qaatay qalabka mirta lagu tumo, sida dubbaha, birqaabka, soofaha iyo birjeebka.

Hawsha Kerow waxay ahayd tu dhib badan, laakin aad xiisa u leh.

Kerow wuxuu naarsimada (*) tagaa goor barqadii ah. Waxaa loo soo qotomiyaa dhiil caano ku jiraan. Dhu-

(*) **Naarsimada:** waa meesha birtumuhu ku shaqeeyo.

xul ayuu naaduurta ku shubtaa. Laba buufimo oo harga ari laga sameeyay oo laba gees biciid ku daaban yihiin ayuu naadurta ku darandoorriyaa. Cad bir ah oo kol madow, kolna guduudan, kolna cad ayuu hadba ka soo bixiyaa. Qofkii Kerow shaqadiisa arkaa kama ag dhaqaaqi jirin. Waxaa lagu dhaygagi jirey siduu u tumayo warmaha waaweyn, billaawayaasha, fallaaraha, mindiyaha, mandiilaha, mudacyada, masaaraha iyo yaambooyinka.

Kerow weligiis xooluhu kama yaraan. Qalabka iyo hubka uu tumo ayuu sii iibsan jirey. Kerow hawshiisa waa jeclaa waana ku faani jirey. Wuxuu oran jirey «dad kasta noloshooda iyo ilbaxnimadoodu waxay ku xiran tahay inta farsamadoodu la eg tahay.»

Kerow been ma sheegin, maxaa yeelay maraakiibta, dayuuradaha, gaariyaasha iyo cagafcagafyada waxaa sameeyay farsamayaqaan birtume ah.

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Birtumiddu dhaqaalaha dalka maxay u tartaa?
2. Markuu Kerow birta tumayo muxuu soo qaadan jirey?

## MAXAA DUNIDA IS WADA DABA DHIGAY?

Maxaa cirka caadka daba dhigay?
caadka daruurta daba dhigay
daruurta roobka daba dhigay
roobka rayska daba dhigay
doogga duunya daba dhigay
duunyada caana daba dhigay
caanaha subagga daba dhigay
subagga dumarka daba dhigay
raggana dumarka daba dhigay
maxaa dunida is wada daba dhigay?

## KOOLKOOLIS CARRUUREED

Maandhow haddaad gaartood gabowdo
haddii Guulle Allaa yeelo
haddii geeleenna la qaado
hadday raadcaddu ruclayso
haddii meel laysku gaaro
rasaastu hadday gariirto
mar uun baad go'i lahayd
maandhow guntoo geela ha ka roorin

Casharka 49

## IIDAHA

Iidaha dalkeenna laga iido waxay u kala baxaan labo jaad. Kuwa diiniga ah iyo kuwa kale. Kuwa diinta waxaa ka mid ah Iidda soonfurka, tan Carrafada iyo Mowliidka oo aynu ka soo hadalnay.

Iidda Soonfurku waa tan soonqaadka ka dambaysa. Maalintaas in la soomo ma bannaana, waxaana loola dan leeyahay in Muslinku nasto, is-arko, xarragoodo, dadka dhibaataysanna wax la taro.

Iidda Carrafadu waxay ku jirtaa bisha toban iyo labaad oo sannadka dayaxaadka, laga bilaabo maalinta tobnaad ilaa maalinta labo iyo tobnaad. Bishaas waxaa la yiraahdaa **bisha Xajka** ama **Carrafo.** Iiddani iidaha muslinka waa tan ugu weyn uguna dheer. Waxaa loo xajiyaa Maka oo ay ku taal **«Kabcadii»,** waxaana la soo siyaartaa Maddiina oo uu ku yaal **qabrigii Nebigeenna Muxamad,** naxariis iyo nabadgelyo korkiisa Ilaahay ha yeelee.

Iidaha ummadda oo waaweyn waa afar; siday u kala fil weyn yihiin haddaan u kala hor marinnana waa:

1. **Dabshidka** oo ah kowda sanadka Somalida.
2. Lixda iyo labaatanka bisha **Jun** oo ah maalintii uu gobannimadiisa qaatay Gobalka Waqooyi ee Jambu-riyaddeenna.
3. Kowda bisha **Lulyo** ee ah maalintii **israaca** iyo go-

bannimada labada gobol ee Jamburiyaddeennu ka dhisan tahay.

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Waa immisa iidaha ummadda Somalidu?
2. Iidaha aan diiniga ahayn tee baa u weyn oo si gaar ah waddankoo dhan looga iidaa?
3. Qor sida dadku u iido 21 Oktobar.

## Casharka 50



### MIRAHA

Dalka Somaliya waxaa laga helaa miro badan oo kala geddisan. Waxayna u kala baxaan: kuwo la abuuro iyo kuwa aan la abuurin oo miyiga ka baxa. Miraha miyiga ka baxa ee aan la beerin qaar baa sun leh oo bad-

dii la cuno lagu dhintaa. Waxaa lagu gartaa daayeerka iyo ugaartuba ma cunaan.

Miraha la abuuro ee beeraha ka baxa way badan yihiin (*). Waxaa ka mid ah qare, mafafay, cambe, saytuun, canab, moos, liin iyo kuwo kale oo fara badan. Mirahaas la beero qaar waa macaan, qaarna waa dhanaan. Dadku aad bay u jecel yihiin oo u cunaan, maxaa yeelay, waxay leeyihiin nuxur (nahal) badan oo dadka xoog iyo caafimaadba u kordhiya. Dadka deggan webiyaasha jiinkooda sida ay u abuuraan firiga ayay mirahaasna u abuuraan oo markay u baxaanna magaalooyinka ka iibsadaan.

**Layli:**

**Erayadan jamac ka dhig.**

1. cambe, miro, beer, qare, canab, iniin, moos, firi.
2. sheeg toban geed oo mirahooda la cuno.
3. Sheeg saddex eray oo kuu sheegaya **miro gooni ah.**

---

«...Dadweynaha oo lala xiriiraa, waa waxa ugu weyn wax kasta, markii aynu ku soconno jidka horukaca». Jaalle Maxamad Siyad Barre, Madaxweynaha Jamhuriyadda Dimoqaradiga Somaliya (22 Mey 1970).

---

(*) Dhulkeenna meelaha qaarkood waxaa miraha loo yaqaan: **yicibta, gobka, hohobta,** iwm.

## Casharka 51

## MACALLINKA

Saddexdii ka waaweynaa goortii mid beerrey noqday, oo mid geedaqore noqday midna birtume, ayaa Dirir oo da' afaraaddii Barre ahaa, wuxuu doortay inuu noqdo Macallin.

Dirir wuxuu ahaa wiil wax garad ah oo maskax furan. Wuxuu aad u jeclaa waxbarashada. Wuxuu qabay in qof walba dadnimadiisu ku xiran tahay inta aqoontiisu la eg tahay. Wuxuu macallinnimada u doortay inuu dadka aan wax aqoon wax baro.

Buug walba waa akhrin jirey, qof kasta oo wax yaqaanna wuu la sheekaysan jirey. Dadka wax barta waa u bogaadin jirey, waana jeclaa.

Habeenkii wuxuu ku dhafri jirey casharrada uu ardadiisa berri siin doono. Maalin kasta ardada dugsiga wuu uga soo hor mari jirey. Dirir wuxuu ahaa codkar ardadana si wanaagsan buu wax u dhacsiin jirey, ayaguna way jeclaayeen.

Wax weydiinta ardada Dirir kama daali jirin. Ardayga aan fahma badan lahayn ama damiinka ahna ma nici jirin ee waa taageeri jirey, waana dhiirri gelin jirey. Dirir ardadiisa ma dili jirin ee waa waanin jirey.

Dirir xoolaha iyo lacagta walaalihiis helaan ma heli jirin. Macallinnimada mushaar yar ayuu ku qaadan jirey.

Markuu wax aqoon la'aanta ka digayo, wuxuu had iyo goor ku maahmaahi jirey. «Ma waxaan wax ogeyn

baynu wax la qaybsannaa mase badda ayaynu dhurnaa?».

Layli:

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Dirir muxuu macallinnimada u doortay?
2. Ardada aan fahmada lahayn Dirir sidee kula dhaqmi jirey?

## Casharka 52


## QODOBBADA

Qodobku wuxuu si gaar ah u caddeeyaa magaca markaa laga hadlayo, sida:

| | |
|---|---|
| Nin**ka** | Nin**ku** |
| S**aca** | S**ucu** |
| Goof**ka** | Goof**ku** |
| Kiish**ka** | Kiish**ku** |
| Daw**ga** | Daw**gu** |
| Soof**aha** | Soof**uhu** |
| Naag**ta** | Naag**tu** |
| Feer**ta** | Feer**tu** |
| Caw**da** | Caw**du** |
| Arda**da** | Arda**du** |
| **Bisha** | **Bishu** |
| **Dhiisha** | **Dhiishu** |

**Layli :**

Qor labaatan magac (toban lab iyo toban dheddig) oo mid walba qodobkiisa raaci.



## XOOLAHA

Adduunyada kale dadka intiisa badani waa reer magaalo ama waa beerrey. Somalida inta badani waa xoolaaley. Xoolaha Somalidu waa geel, lò iyo ari. Xagga tirada haddii la eego Somalida waxaa ka badan xoolaheeda.

Somalidu geela ayay ugu jeceshahay xoolaheeda. Way ku faanta geela. Waxaan lòda iyo ariga midkoodna u tari karin ayaa geelu u taraa. Dheddigga geela waa la maalaa oo caanihiisa waa laga jecel yahay kuwa xoolaha kale. Geelu wax ka adkaysi badan oo goortii xoolaha kale guraan asagu wuu irmaan yahay. Geela waa la rartaa oo nolosha reer guuraagu asaga ayay ku xiran tahay.

Geeljiruhu ka xoog badan kana fayoobi badan dadka kale, waxaana ugu wacan geela.

Lòdu si kale ayay wax u tartaa. Kolkii ay bar-waaqa tahay geela ka caana badan, kana subag badan. Sida goolasha geela, waxay lòdu leedahay dibì buurbuuran oo la qasho ama la dhoofsado. Lòdu geela ka saan (sad) wanaagsan oo waxaa laga tolaa kabaha.

Arigu waa ido iyo riyo. Idaha Somalidu waxay caan ku yihiin bari weyn iyo madax madow. Sida goolasha geela iyo dibida lòda waxaa idaha loogu jecel yahay wananka, riyahana orgida waaweyn. Haddaan baruurta loo eegin, riyuhu ka hilib macaan idaha kana caana badan.

Arigu waxtar badan ayuu reerka u leeyahay sida geela iyo lòda oo kale.

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Somalidu jaadkee u jeceshahay xoolaheeda?
2. Geela iyo ariga kee dadka u waxtar badan?

**GABAY**

Illeen caano waa kala xirmaan
xoorta iyo dhayda
Illeen geela xawlkiyo wadnuhu
laba xubnood weeye
Illeen xabagta geedaha ku taal
gabal xaraar weeye

Rage Ugas

## Casharka 54

## GACANTA MAROODIGA

Waagii hore maroodiyaasha awowgood wuxuu ahaa maroodi aad iyo aad u weyn oo ballaaran. Maroodigaasu wuxuu lahaa dabo gaaban iyo san yar oo bagafsan. Maalin uu aad u dhergey ayuu geed weyn hoosta ka seexday. Markaasaa Bakayle yar u yimid maroodigii oo hurdaya, aayar buu libaax dabada kaga xiray, shabeelna sanka. Kolkaasuu bakaylihii buur meesha ku dhaweyd koray oo aad u qayliyay oo yiri «Maroodow, maroodow, dabadaadii iyo sankaagii way xiran yihiin».

Maroodigii baa kacay isagoo si weyn u caraysan, markaasuu ciyey oo ciyey.

Dugaag baa kaddib soo baxay, oo markay arkeen waxayaalaha meesha ka socda mid waliba naftiisa la cararay. Libaaxii gees buu u cararay, shabeelkiina geesta kale ayuu u cararay. Intaasna maroodigii bay kala jiidanayaan. Sidaasay maroodiga dabadiisii dheerayd u go'day una gaabatay, sankiisiina u dheeraaday oo loogu magcaabay gacanta.

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Sidee buu ahaa maroodiyaasha awowgood?
2. Muxuu sameeyey bakaylihii yaraa?
3. Yaa kala jiidey maroodigii?
4. Masawir maroodigii iyo bakaylihii yaraa.



## A W R K A

Awrku waa neef geel ah oo lab. Wuxuu u kala baxaa baarqab oo ah kan geela lagu daro, koron oo ah kan la naaxiyo ee la gado iyo raray oo ah kan la dhaansado ama aqalka iyo alaabta la saaro ee lagu guuro. Somalidu waxay ku maahmaahdaa, «Rati la'aan reer ma guuro». Awrta la rarto Somalidu aad bay u jeceshahay, maxaa yeelay awr la'aanteed reer miyigu ma dhaqmi kareen. Awrta waa la rartaa, oo waa la dhaansadaa, waxna ka adkaysi badan. In badan ayuu awrku socon karaa ama lagu shaqaysan karaa asagoo aan wax cunin, waxna cabbin.

Arwka la rar barayo waxaa la yiraahdaa **layli.** Mar-

kuu rarka bartana **hayin.** Xarigga luqunta iyo madaxa looga xirana waxaa la yiraahdaa **hoggaan.** Kan labada addin oo hore looga xirana waxaa la yiraahdaa **dabar.** Awrka rar bartay geela laguma daro ee guriga ayaa lagu reebaa.

**Awrku waa gaadiidka lagu joogo miyiga.**

**Layli:**

**Erayadan dheddig ka dhig.**

1. Awr, faras, orgi, libaax, dibi, aqal, dabar, hayin, ceel, xarig, geel, dowli, hoggaan, koron.

## Casharka 56

### SOMALIYA WEEYE WADDANKEENNU

Somaliya weeye waddankeennu
Waxaynu nahay carruurteed
oo waynu ka adkaan cadawgeeda
oo waynu heli abaalgudkeen
nolosha carruurteenna weeyaan
xumaan inaan qaadan weynoo
jahaadka waddankeenna weeyaane
maanta iyo maalin walba
nolosha waddaankeenna weeyaane
inaan yeelno wanaaggeeda
talada inaan qaadannoo
aynu meel wada marnoo
addoon deegteed lahaan maynoo

addoon dambe ahaan maynoo
waxaan nahay carruurteediyo
deegteed aan ku shahiidno

**Layli:**

**Heestan Kor ka baro**

## Casharka 57

## ISROGROGGA CODADKA

Rogrogidda codadku way beddeshaa macnaha erayada af Soomaliga, sida:

| **Lab iyo dheddig** | | **Keli iyo jamac** | |
|---|---|---|---|
| ìnanka | inanta | bàlliga | ballida |
| damèerka | dameerta | dìbiga | dibida |
| àrrinka | arrinta | àwrka | awrta |
| bèerka | beerta | càwlka | cawska |


## XIRIIRIYE

Afka waxaa ka mid ah erayo isku xira qaybaha hadalka intooda kale, waxayna ka kooban yihiin:

Iyo, amase, oo, ee, na, ba, se, laakin, intii, iwm.

**Tusaale:**

1. Enow **iyo** Diriye baa yimid.
2. Dirir **ama** warsame, kii aad doonto u sheeg.
3. Isagaa ii sheegay, anigu**se** ma arag.
4. Hargaha qaad **oo** Berbera ka soo iibi.
5. Guled Dugsiga hoose ayuu dhigtaa Mullaxa**na** kan dhexe.



## EDEBTA JIDKA LOO MARO

Somaliya magaalooyinka waaweyn sida Xamar oo kale waxaa laga helaa jidad waaweyn oo dadka iyo baabuurtuba isku garab maraan. Jidadkaasi waxay u qaybsan yihiin meel uu maro dadka lugta ah iyo meel ay maraan baabuurtu. meesha dadku maro waxaa la yiraahdaa «Jidlugeed».

Qof waliba waa inuu yaqaannaa edebta jidka loo maro. Waa inuu ilaaliyaa qawaaniinta jidadka. Haddii aad lugaynayso oo aad rabtid inaad jidka ka gudubto, waa inaad istaagtaa oo hareerahaaga eegtaa, markaad arki waydo baabuur kugu soo dhow waa inaad dhaqso

jidka uga gudubtaa. Haddii aadan sidaa yeelin, baabuurta ayaa ku dardari doonta.

Meelaha baabuurta iyo lugtu ku badan yihiin waxaa jooga booliska jidka oo waxay kala ilaaliyaan baabuurta iyo dadka. Jidadku waxay leeyihiin nanal midabyo leh Midabka cagaaran oo qofku ku sawiran yahay markuu soo daaımo ayaa dadka lugta ah loo oggol yahay inay gudbaan. Labada midab oo kale baabuurta ayaa iska leh.

**Layli:**

**Erayadan weero ku dar.**

1. Maraysa, yeelaan, maristooda, gudbaan, falaa, sameeyaan.

**Ka jawaab su'aalahaan.**

1. Jidka'la maro immisuu u qaybsamaa?
2. Sidee jidka looga gudbi karaa?
3. Markaad jidka socotid geestee martaa?
4. Booliska jidka hawshoodu waa maxay?

## Casharka 59

## QORAHA

Barre wuxu lahaa Wiilal badan waxaana u yaraa Warsame. Kolkii walaalihiis mid noqday **beerrey,** mid **geedaqore,** mid **birtume,** midna **bare,** Warsame wuxuu goostay inuu noqdo **qore.**

Warsame wuxuu ahaa wiil fahma badan oo garasho iyo fiiro dheer lagu yaqaan. Wax walba waa fiirin jirey oo dabadeed faalleyn jirey. Buug dhigidda wuxuu bilaabay isagoo yar. Goortuu doonayo inuu buug dhigo wuxuu soocan jirey dulucda uu buugga ka qorayo iyo buugga magaciisa.

Buugga intuusan bilaabin, ayuu u kala saari jirey qaybo oo markuu isku jaangooyo, ayuu buug noqon jirey. Kolkuu sheekada dhammeeyo wuxuu horay ama gadaal ka raacsiiyaa **tusmo** lagu garto waxa buugga ku qoran.

Buugga markuu dhammeeyo, wuxuu la aadi jirey dad wax yaqaan si ay wixii aan toosnayn wax uga sheegaan. Kolkaas kaddib ayuu buugga daabici jirey.

Walaalihiisa beerta fala ama geedaha qora ama birta tuma, waxay la ahayd in Warsame uusan hawl qaban, maxaa yeelay, ma ay garan karin hawsha maskaxda laga qabtaa dhibka iyo noogga ay leedahay.

Warsame wuxuu sii iibsan jirey buugaggiisa, si fiicanna waa u noolaa.

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Haddii lagu doorransiiyo shaqooyinkaas tee baad dooran lahayd?
3. Hawsha qoruhu dhib badan ma leedahay?



## LIBAAX IYO JIIR (DOOLLI)

Libaax baa geed hostii jiifay. Markaas ayaa doolli madaxa ka maray. Isla markiiba waa kacay waana qabtay jiirkii, isaga oo caraysan buu wuxu ku yiri: «Sidee baad hurdada iiga kicin kartaa, sow ma ogid inaan hadda ku dili karo». Markaas baa dolligii baqay oo baryey libaaxii. Wuxuu ku yiri, «Anigu ma doonayn inaan hurdada kaa kiciyo waase iga noqotay. Waxaan kaa baryayaa inaad i cafidaa, aniguna mar uun baan kuu abaal gudi doonaa».

Libaaxii ayaa qoslay, oo yiri: «Anigu waan ku deynayaa, hase yeeshee, ilama aha inaad ii abaal gudi doontid».

Dhawr maalmood kaddib ayaa libaaxii ku dhacay dabin loo dhigay. Markaasuu ciyey oo raftay kuna dadaalay inu dabinka ka baxsado, laakin xooggiisii iyo dadaalkiisii waxba uma tarin. Doolligii baa maqlay

libaaxa cidiisii. Markaasuu u yimid oo ku yiri: «Ha murugoon anigaa kaa saari doona dabinkee».

Markaasuu bilaabay jiirkii inuu ilkihiisi afka badnaa ku jarjaro dabinkii xarigga ahaa. Muddo yar kaddibna libaaxii waa ka baxay dabinkii. Libaaxii waa farxay, wuxuuna mahad u celiyay jiirkii ka nabad geliyey dhibaatadii qabsatay. Wuxuu ku yiri: Uma malayn jirin in bahal yar oo adoo kale ah waxtar leeyahay». Jiirkii wuxuu ugu jawaabey: «Ku tala gal, hadda kaddib inay bahallada yaryari wax u tari karaan kuwa waaweyn».

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Jiirka markii libaaxu qabtay muxuu ku yiri?
2. Libaaxu markuu dabinka ka soo baxay muxuu yiri? doolliigiise muxuu ku jawaabey?

## Casharka 61

## GEEDAHA TIMIRTA

Dhirta dhulka ka baxda waa badan tahay, waana kala duwan tahay. Dhirta waaweyn ee waxtarka leh waxaa ka mid ah timirta. Timirtu meela badan oo dhulkeenna ah bay ka baxdaa. Geedka timirta jirriddiisu way dheer tahay, waana weyn tahay, laamo balballaaranna way leedahay.

Dhirtaasi milicda iyo hawada si aad ah ayay ugu baxdaa. Geedka timirta waxaa laga diiraa mayrax laga sameeyo xargaha doonyaha iyo wax la mid ah. Waxaa

kaloo jira laba geed oo la walaal ah geedka timirta. Labadaa geedna waa **cawga** iyo **geedqumbaha.**

Geedka timirtu wuxuu dhulka uga soo baxaa sida galleyda, laamihiisuna waa dhaadheer yihiin sannad walbana wuu dhalaa. Mirihiisu marka hore waa curdan, marka xigana waa gahayr. Markay aad u bislaadaanna waa timir. Timirtu way macaan tahay, jirka dadkana wax bay u tartaa. **Timirtu waa xalwadda reer miyiga.**

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Waxaad qortaa meelaha geedka timirtu ka baxo.
2. Sawir geedka timirta oo qor qaybihiisa.
3. Timirta maxaa laga sameeyaa?

«..Saldhigga dhaqaalaha dad kasta barwaaqadiisu Waxay ka timaaddaa niyaaddiisa xoogga leh iyo tacliintiisa».
Jaalle Maxamad Siyad Barre, Madaxweynaha Jamhuriyadda Dimoqaradiga Somaliya (6 Nofembar 1969).

## Casharka 62

# HANTIWADAAGGA CILMIGA LAGU HABEEYEY

### (hees waddani ah)

Waa hilinka
Nolol hagaagsan oo habboon lagu helaayee;
Waa hilinkii
Harraadka iyo gaajada lagu hilmaamayee;
Waa hilinkii
Kuwa dhiigga heensada hanaqa goynayee;
Waa hilinikii
Sinnaan la wada helaayo iyo hayey garsooriddee;
Waa hilinkii
Dadkoo shaqo u heeganoo hal ah tilmaamayee;
Waa hilinkii
Nin hurdoo wax helaya iyo hagarta diidayee;
Waa hilinkii
Nafteenna oo aan hiishanniyo kalsooni noo hayee;
Waa hilinkii
Inaynu hal ahaanno oon is helno doonayee;
Waa hilinkii
Gumeystaha wax heera iyo harkiisa diidayee;
Hantiwadaagga cilmiga lagu habeeyey;
Waan u hiillinaynaa
Waan u hagarbaxaynaa
Cadawga waan ka hor joogsanaynaa;
Hantiwadaagga cilmiga lagu habeeyey.

Cabdi Muxumad

**Layli:**

1. Heestan si wanaagsan kor uga baro.

## Casharka 63

## TILMAAME IYO MAGACUYAAL SU'AALEED

**(kee?, tee?, kuwee?)**

Erayadani marka ay magaca racaan waxay qabanayaan shaqadii tilmaamaha weydiinta marka ay kaligood istaagaanna waa magacuyaal su'aaleed.

1. Waa **kee** ninka yimid?
2. Waa **kee** aqalka bannaan?
3. Waa **tee** gabadha macallimadda ahi?
4. Waa **tee** magaalada somaliya u weyn?
5. Aqal**kee** baad dhisaysaa?
6. Xag**gee** ka shaqaysaa?
7. Waa nimaan**kee** kuwa la soo qabqabtay?
8. Buug**gee** baad adigu qortay?
9. Habar**tee** baabuurka ka dhacday?
10. Us**hee** baad soo goosatay?

> «...Innagu waannu taageereynaa dhaqdhaqaayada Afrika ee u halgamaya xurnimadooda iyo gobonnimadooda, intii hal dhudhun oo dhul ahi gunnimo ku jiro oo dadka Afrika ka curyaansan yahay dhinaca sharafta iyo dhaqaalaha».
> Jaalle Maxamad Siyad Barre, Madaxweynaha Jamhuriyadda Dimoqaradiga Somaliya (1 Lulyo 1970).



## BARANBARO

Baranbaradu waa cayayaan ka dhasha qashinka iyo wasakhda. Sida diqsiga ayaa baranbaradu jeceshahay inay ku noolaato meeshii qashin leh ama ha qallalnaato ama ha qoyanaatee. Baranbaradu guud ahaan laba jaad ayay u kala baxdaa: Mid waa guduudan tahay oo baalal ma leh inta ay yaryar tahay, laakiinse markay weynaato ayay u soo baxaan. Baranbarada kale waa madowdahay oo waqti walba waa daba qoyan tahay, waxaana la yiraahdaa «Baranbaro kaadiley».

Baranbaradu waxay dhashaa ukun, waxayna gashaa oo ku dhuumataa musqulaha iyo meelo kale. Baranbaradu waxay jeceshahay mugdiga oo habeenkii bay soo baxdaa, iftiinkana way neceb tahay.

Cayayaanka wasakhda ah ee cudurradu ka dhashaan ayaa baranbaradu ka mid tahay. Goor walba afkeeda, addimadeeda iyo oogadeeduba waa qoyan yihiin, uurkana waxaa uga buuxa jeermi. Wixii ay ku dhacdo ama taabatana jeerimigaas iyo wasakhdaas bay ku reebataa markaasaa cudur laga qaadaa.

Baranbarada haddii lala dagaallamo waa la iska celin karaa. Gurigii la nadiifiyo oo la hagaajiyo, alaabta taallana si wacan loo dhaqo oo loo tirtiro, baranbaro kama dhalato, agtiisana ma timaado. Sidaas awadeed, guryaha waa in laga shaqeeyaa oo maalintii ilayska iyo qorraxda loo furaa oo gogoshiisa iyo alaabtiisa kalena aad loogu dadaalaa. Musqulaha iyo dhuumaha biyaha qaada waa in daawo lagu shubaa oo laga ilaaliyaa baranbarada.

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Baranbaradu xaggee bay ku badan tahay? Goormaase la arkaa?
2. Sidee baranbarada laysaga ilaaliyaa?

Casharka 65

## GUURKA

Dhaqanka aadanaha waxaa ka mid ah guurka. Cid walba oo meel deggani waxay leedahay xeer u gaar ah oo ay ku dhaqanto. Guurka waxaa loo qaybiyaa «iska guursi» oo ah markii cidi dhexdeeda iska guursato iyo «kala guursi» oo ah markii laba cidood kala guursadaan. Labada waxaa sarreeya kala guursiga, maxaa yeelay laba cidood oo aan horti wax waadaagin ayuu isu keenaa. Waxyaalaha laysku barto waxaa ka mid ah kala guursigaas, maxaa yeelay markii laba xaas xiriir yeeshaan wax bay kala bartaan oo is dhaafsadaan.

Markii ay taladu reerka joogto waxaa la isu guursanayaa waa gelinka iyo wadaxoogsiga. Gelinku wuxuu keenaa in la tarmo. Haddii aan taran jirin aadanuhu sida uu hadda dunida u hantiyey uma bateen. Sidoo kale wada xoogsigu waa lagama maarmaan. Haddii aan la wada shaqayn reerku ma dhismeen mana dhaqmeen.

Somalidu si wacan ayay isu guursataa oo waa wada muslin. Waxay leedahay muslinka kalena la wadaagtaa xeer adag oo guurku leeyahay oo aan la jebin karin. Somalidu sina uma oggola naag gashaannimo lagu haysto iyo ilmo aan nikaax ku dhalan.

Inkastoo guurkii soo xumaanayo siiba magaalooyinka waaweyn, runtu waa inaan laga maarmi karin guur wanaagsan oo diinta waafaqsan. Guurka wanaagsani

wuxuu ku xiran yahay sida qof waliba u aaminsan yahay diinta ulana socdo nolosha iyo xeerka toosan ee dadkiisa.

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Guurku muxuu ku wanaagsan yahay?
2. Somalidu sidee isu guursataa?
3. Dadka kale sidee isu guursadaan?

## WAANO HOOYO

Ayaan noolba tii qaylisaa
waa ibliis falane
irdha (digtoonaan) qaado aashaana soco
aayar hadalkaaga
is-ogow afkaagana yasiro (aamus)
edebtu waa doore

(Gabar waliba kor ha ka barato waanadan.)

## Casharka 66

## TIRO MAGAC

Tiro magac waxay sheegtaa **keli iyo jamac.** Magacyada lab qaarkood markay jamac noqdaan waxay qaataan dhammaad dheeraad ah kana dhisan shaqalka « a » iyo shibbanaha magaca u dambeeya, sida:


| **Keli** | **Jamac** |
|---|---|
| War | Wa**rar** |
| Raad | Raa**dad** |
| Dal | Da**lal** |
| Nal | Na**lal** |
| Jeeb | Jee**bab** |
| Mar | Ma**rar** |
| Duul | Duu**lal** |
| Miis | Mii**sas** |

Magacyada qaarkoodna waxay qaataan « o » shibbanaha u dambeeyana wuu labalaabmaa, sida:

| **Keli** | **Jamac** |
|---|---|
| Wadaad | Wadaa**ddo** |
| Hadal | Hada**llo** |
| Albaab | Albaa**bbo** |
| Dabar | Daba**rro** |

Magacyada qaarkood waxay xagga dambe ka qaataan « yaal » sida:

| **Keli** | **Jamac** |
|---|---|
| Waraabe | Waraaba**yaal** |
| Dubbe | Dubba**yaal** |
| Oday | Oda**yaal** |
| Gò | Gò**yaal** |



## FIIDMEERTA (KABELLI)

Weligaa fiidmeer ma aragtay? Haddaad aragtay, ma shimbir baa, mase waa xayawaan? Fiidmeertu shimbir bay kuula eg tahay, laakin ma aha sidaad moodday. Waa xayawaan duula baalal la'aan. Haddaad sawirkeeda u fiirsato, waxaad garan kartaa inay lugaheeda hore leeyihiin xusullo iyo faro dhaadheer. Farahaas dhexdooda harag adag baa ku yaal. Fiidmeertu maalintii sooma baxdo, maxaa yeelay, maalintii indhaha si fiican wax ugama aragto. Habeenkii bay soo baxdaa oo mirataa. Ma aragtay fiidmeer hurudeysa? Fiidmeertu geed bay iska soo laalaadisaa inta cagaha ciddiyahooda meel ku qabsato. Inta badan fiidmeertu waxay ku nooshahay cayayaanka yaryar oo ay cuntaa, qaarkoodna cagaarka iyo wixii la

mid ah bay cunaan. Haddii ay fiidmeertu aqalka kaa soo gasho oo aad damacdo inaad qolka ka saartid habeenkii, marka hore hubso in dariishadaha iyo irdduhu furan yihiin, si ay uga baxdo, haddii kale waxaa la arkaa inay wejiga kaaga dhacdo oo indhaha wax kaa yeesho.

**Layli:**

**Erayadan jamac ka dhig.**

1. Shimbir, baal, lug, dheer, weyn, far, harag.

**Erayadan weero dhex geli.**

2. Dhexdooda, duusha, hurudda, cuntaa, qabsato.

## Casharka 68

## MAXAAD JECLAAN LAHAYD INAAD NOQOTID MARKAAD WEYNAATID?

Arday waliba mar kasta wuxuu niyadda ku hayaa wuxuu noqon lahaa ama shaqaduu qaban lahaa markuu weynaado. Macallin baa arddiisii weydiiyey mid waliba wuxuu jecel yahay inuu noqdo markuu weynaado. Jawaabtii u horreysay waxaa sheegay Samatar, oo wuxuu yiri: «Anigu waxaan jeclahay inaan noqdo taqtar, sababta oo ah waddankeennu wuxuu aad iyo aad ugu baahan yahay taqtarro ka hor taga cudurrada halista ah oo faraha badan.

Waxaa istaagtay Beydan oo tiri: «Waan ka duwannahay wiilkii hore, maxaa yeelay, waxaa ila wanaagsan inaan noqdo macallimad. Dadka horuumaray waxay ku

gaareen heer kore tacliin iyo dadaal ay ka heleen aqoonta macallinka. Waddamada qaarkood, dadkooda inta badani wax ma qoraan, waxna ma akhriyaan. Taas waxaa looga nabad geli karaa inay helaan macallimiin waddani ah oo u hura aqoontooda abaal la'aan».

Guled baa ku xigey oo wuxuu yiri, «Marar badan ayaan anigu ku tashaday hawsha aan waddankayga u qaban doono gortaan weynaado, waxayna talo iiga dhammaatay inaan noqdo askari, anigoo ula jeeda askarigu hadduusan jirin, nabadi ma jirteen. Dadka ninba ninkuu ka xoog roon yahay buu xoolaha ka dhici lahaa, naftiisana halis gelin lahaa. Shisheeyuhu wuxuu damci lahaa inuu qabsado dadka iyo dalka aan lahayn askar daafacda.»

Macallinkii ardadi aad buu u ammaanay, wuxuuna u sheegay inay giddigoodba doorteen shaqooyin loo baahan yahay, lase doonoyo in marka hore wax la martaa, kaddibna waddanka si daacadnimo ah loogu shaqeeyaa.

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

a) Samatar muxuu jeclaystay inuu noqdo, maxaana u sabab ahaa?

a) Ka warran waxay dooratay Beydan.

c) Guled muxuu macallinkii ku yiri?

## Casharka 69

### FAL AHAANSHO

| | |
|---|---|
| anigu waxaan ahay | innagu waxaan nahay |
| adigu waxaad tahay | idinku waxaad tihin |
| asagu wuxuu yahay | iyagu waxay yihiin |
| ayadu waxay tahay | |

---

| | |
|---|---|
| waan ka xumahay | waan ka xun nahay |
| waad ka xun tahay | waad ka xun tihiin |
| wuu ka xun yahay | way ka xun yihiin |
| way ka xun tahay | |

### FAL LAHAANSHO

| | |
|---|---|
| anigu waxaan leeyahay | innagu waxaan leenahay |
| adigu waxaad leedahay | idinku waxaad leedihiin |
| asagu wuxuu leeyahay | iyagu waxay leeyihiin |
| ayadu waxay leedahay | |

**Layli :**

1. Qor toban weerood oo fal ahaansho ku jiro.
2. Qor toban weerod oo fal lahaansho ku jiro.
3. Sheeg waqtiga tegay ee fal ahaansho iyo fal lahaansho.

## Casharka 70

## BEERAHA

Somalida in badan baa beeraley ah. Beerahaas qaarkood roob bay ku baxaan, qaarna biya webi ama roob intaba. Kuwa webigu waraabiyo had iyo goor waa baxaan. Kuwa roobkuse gùga iyo deyrta keliya ayay baxaan.

Beeraha roobka keliya ku baxa waxaa ka mid ah kuwa meseggada, sarreenka, galleyda, digirta iyo qaraha. Kuwa webiga ama roobka labadaba ku baxa waxaa ka mid ah mooska, cambaha, babayga, sisinta, liinta, cagaarka iyo kuwa kale. Beeraha webiga waxaa kale oo ka mid ah kuwa sonkorta, kuwa cudbiga iyo kuwa tubaakada.

Haddii aan abaari dhicin Somalida beeraheedu way ku filan yihiin. Waxa keliya oo Somalidu dibedda ka keensataa waa bariiska iyo baastada oo laga sameeyo sarreenka. Bariiska inta la tijaabiyey ayaa waxaa sugnaatay inuu dhulkeenna si fiican uga bixi karo.

Dhulkeenna inta wax ka bixi karaan haddii la beero waxay ku filan tahay dadka haatan deggan iyo boqollaalkood.

Dhaqaalaha dalkeennu wuxuu ku xiran yahay beeraha iyo xoolaha. Xannaanada xoolaha iyo falidda beeraha waxaa lagu gaaraa nolol sare, waana lafdhabarta dhaqaalaha Jamhuriyadda Somalida.

**Layli:**

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Beeraha dalkeenna maxaa ka baxa, maxayse ku baxaan?
2. Biyaha roobka maxaa lagu abuuraa?

## Casharka 71



### IIDDA 21 OKTOBAR

Kow iyo labaatanka Oktobar waxaa weeye maalintii Tawradda lagu diirsaday ay ka dhalatay dalka Jamhuriyadda Dimoqaradiga Somaliya. Sannadku markuu ahaa Kun iyo sagaal boqol iyo lixdan iyo sagaalkii (1969), ayaa Tawraddu xukunkii iyo maamulkii waddanka kala wareegtay dawladdii ka horreysey ee dibusocodka ahayd.

Kow iyo Labaatanka Oktobar waa maalin weyn oo dadka Somaliyeed wada jecel yahay. Magaalooyinka dalka ku yaal oo dhan si weyn baa looga dabbaal degaa oo looga xusaa maalintaas qaayaha iyo qiimaha weyn u leh dadka Somalida.

Magaalooyinka waa la nadiifiyaa oo waa la caddeeyaa. Waxaana lagu safaa nalal kala jaad ah oo qurux badan. Dadku waxay maalintaa qaataan dharkooda midka ugu qurux badan, waxayna u soo baxaan oo isugu yimaadaan meelaha cayaaraha iyo dabbaldegga laga samaynayo. Meel walba waxaa laga taagaa calanka waddanka. Magaalada Xamar oo ah xarunta Jamhuriyadda Dimoqaradiga Somaliya si gaar ah ayaa looga xusaa maalintaas weyn ee iidda ah. Kooxa ka mid ah ciidamada qalabka sida ayaa mara magaalada jidadkeeda waaweyn. Kow iyo labaatanka Oktobar waa maalin barakaysan oo dadka Somaliyeed farxad iyo wanaag ku iidaan.

**Layli:**

**Erayadan weero ku dar.**

1. Tawradda, xoogga, sannadkii 1969, maalin weyn.

**Ka jawaab su'aalahan.**

1. Goormaa Tawraddu dhulkeenna ka dhalatay?
2. Maxaa loo dabbaal degaa 21 Oktobar?
3. Sheeko gaaban ka qor Tawraddii Oktobar adigoo sheegaya sababta ay u dhalatay.

---

«...Innagu waxaynu doorannay hantiwadaagga cilmiga ku dhisan, maxaa yeelay waa jidka keliya ee abuurid hor leh iyo horukac dhinaca dhaqaalaha noo keeni kara».
Jaalle Maxamad Siyad Barre, Madaxweynaha Jamhuriyadda Dimoqaradiga Somaliya. (4 Dishembar 1971).

---

## Casharka 72

### AFRO—ASIYA (hees waddani ah)

Annagu haddaannu
Ummaddi Somaliyeed nahay
Af buuxaan ku leennahay
Addoonsigu ha baaba'o
Adduunyaduna ha sinnaato
Eexashadu ha dhimato
Xaqu ha adkaado
Afro-Asiya, Afro-Asiya ha israacdo
Aayahoodu ha ahaado, Aayahoodu ha ahaado
Mideey u aayaan ubadkoodu

Annagu haddaynu
Afro-Asiya ururay nahay
Ogaal waxaan u leennahay
Addoonsigu wuxuu wado
Angola iyo Musambig Indo-shayna Sharqul-awsad
Irriddaha Jabuti
Idilkoodba ha xoroobeen
Ilbaxnimo ha gaareen
Aayahoodu ha ahaado, aayahoodu ha ahaado
Mideey u aayaan ubadkoodu

**Digniin:** Tix kastaba ku celi laba jeer marka la qaadayo.

---

«...Saboolnimo gobannimo iyo sharaf leh, waxay ka wanagsan tahay hodannimo iyo barwaaqo gumeysi leh, gobonnimada iyo sharaftu waxay ku jiraan isku kalsoonideenna iyo awooddeenna.»
Jaalle Maxamad Siyad Barre, Madaxweynaha Jamhuriyadda Dimoqaradiga Somaliya, (11 Setembar 1970).

---

Waxaa lagu daabacay
Madbacadda Dawladda
— Muqdisho 1972 —